Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya
Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta
XARUNTA HORUMARINTA MANAAHIJTA

TEL. 21267

S.B. 7163

جمهورية الصومال الديمقراطية
وزارة التربية والتعليم
مركز تطوير المناهج

تلفون ٢١٢٦٧
ص . ب ٧١٦٣

# SUUGAAN

# DUGSIGA SARE

## Fasalka Labaad

## 2

# SUUGAAN
# DUGSIGA SARE
## Fasalka Labaad
## 2

# H O R DH A C

Buuggan oo ah kii labaad ee Suugaanta, waxa loogu tala galay fasalka labaad ee Dugsiga Sare. Buuggu waxa uu ka kooban yahay saddex qaybood oo kala ah: Gabayo, Murti iyo Maahmaah, iyo sheekooyin. Qaybta afraad oo ah riwaayad waxa loo daabacay goonni. Hase yeeshee, buuggan ayaa ay muqarar ahaan la socotaa.

Qorayaashu waxa ay isku dayeen in ay ardayga fasalkaa ku jira fikrad ka siiyaan qaybaha Suugaanta Soomaaliyeed oo dhan, isla mar ahaantaa ay mawaad-iicdaa ay soo xuleen waafajiyaan heerka kasmada ardayga iyo da'diisa.

Waxa ay ka cudurdaaranayaan in aan buuggani marna dhammaystirayn shuruudaha baridda suug-aanta; sidaas awgeed waxa ay codsi ahaan ugu jeed-inayaan barayaasha dhigi doona maadada in ay ku dadaalaan haqabtirka, bojinta iyo dhaqan gelinta mid-hahaan qaybaha ah. Waxa kale oo ay isla mar ahaantaa ogeysiinayaan barayaashaasi in geestood mas'uuliyad culusi ka saaran tahay baadhista, ururinta iyo kobcinta suugaanta guud ahaan.

Xafiiska Manaahijtu waxa uu u mahadnaqayaa Jaal-laayaasha hoos ku qoran oo ka qayb galay ururintii, qoriddii iyo isku dubbaridkii buuggan :

Xasan Aw Daahir Qaalib, Axmed Maxamed Qaaddi, Maxamed Cabdiraxmaan, Cabdillaahi Maydhane War-same iyo Cabdillaahi Cali Axmed.

Waxa iyana mahad gaar ah leh Wakaaladda Madba-cadda Qaranka, oo hawl wanaagsan ka qabtay daab-acadda buuggan.

**Maamulaha Xafiiska Manaahijta**
*Xasan Daahir Obsiiye*

# TUSMO


**Bogga**

1. Guur aan ka la'aado (Gabay) ................ 5
2. Toddobaatan iyo toban (Gabay) ............ 13
3. Tolow ha la dhoofsho (Gabay) ............... 17
4. Geela (Gabay) .............................. 21
5. Fiin (Gabay) ................................ 29
6. Guuguule (Gabay) ......................... 35
7. Guubaabo iyo garanaqsi (Gabay) ............. 41
8. Ma anaa (Gabay) .......................... 45
9. Sheekh Bashiir (Gabay) ..................... 49
10. Hammi (Gabay) ........................... 52
11. Ammaan faras (Geeraar) .................. 54
12. Laygu kaa dherer (Gabay) ................... 58
13. Hooyo (Hees) ............................ 62
14. Nebi amaan (Hees) ....................... 65
15. Suugaanta ................................ 67
16. Maahmaahda iyo murtida ................... 71
17. Sida Banjoogtaan Cidla Beegsaday (Curis) . 75
18. Caga la'aanta ciiddo igu aragtay (Curis) .... 78
19. Anigii roonaa bay i rogtay (Curis) .......... 84
20. Calas iyo Cadduur (Curis) ................. 88
21. Geel badane lagu sheeg (Curis) ............ 91

## CASHARKA 1

*GUUR AAN KA LA'AADO (Aw Yuusuf Cali Xirsi)*

Aw Yuusuf Cali Xirsi, oo ku magac dheeraa Aw Yuusuf Barreh, waxa uu ku dhashay meesha la yidhaa Lehelow. Waxa uu degganaan jirey Qabri-daharre oo ka mid ah magaalooyinka Soomaalida Galbeed.

Waxa uu ahaa gabayaa weyn, oo sharaf iyo wanaag, da' weyn ku gaadhey. Gabaygan waxa uu curiyey isagoo innamo adeer uu u ahaa oo markaa guurdoon ahaa u kala tilmaamayey hablaha, si aan innamada guurku uga xumaan. Waxa uu uga digayey hablaha aan guurka wanaagsan u qalmin.

Soomaalidu guurka aad bay u tixgelin jirtey; ninka guurdoonka ahina gabadha uu xulanayo waxa uu ku raaci jirey tilmaamaha hiddaha iyo dhaqanka Soomaalida aad loogu qiimeeyo. Kuwaas oo ay ka mid yihiin: nadaafadda, maamuuska, dabac-samida, samirka, xoolo-ogaanta iwm.

Aw Yuusuf, gabaygan, isaga oo ku caddaaynaya in naag waliba meel u liidato oo aan mid israacsani jirin, waxa uu inamada kula dardaarmayey in ay iska ilaaliyaan naagaha sifooyinka xun-xun leh. Waxa uu isla mar ahaantaa taabtay in karti-kumada iyo shaqada reerka ee dhibta badan oo naagtu u adkaysan weydaa in ay tahay waxyaalaha aan loogu dulqaadan karayn; maxaa yeelay, nolosha uu markaa Aw Yuusuf ku noolaa waxay ahayd nolol baadiye oo aad u shiddo badan una baahan iskaashi iyo wax wada qabsi.

Aw Yuusuf wuxuu soo qaaday gabadha oo quruxda keli ah loo raacaa in ay tahay gef, wuxuuna yidhi :

Guduud looma raaco haween gobolba waa cayne
Bidhaan gebi ka laalaadda waa laga gulaalamaye

Gurey iyo Darroorow arrin waygu gebileeye
Wax i galayba waan uun galgalan goor iyo ayaane
Gelmidhabadka waxa iigu wacan hal iyo gaaraaye
garanweyde meeshaan qalbiga uga gufaacoone
Guddigeyga caawaba maqla oo geliya laabtiinna
Oo wada guntada xaajada odaygu soo guurshey.
Gaash gaashka waa lagu lumaa gole ka fuulkaase
Ha guddoonsan waa kii caqligu gaanka ku ahaaye
Guri bila ninkii doonaya oo nacaya goonbaarta.

Ee guur u jeedow i maqal waan ku garansiinne.
Guduud looma raaco haween gobolba waa cayn.
Bidhaan gebi ka laalaadda waa lagu gulaalamaye
Isu gaadhey gabadhaad tidhaa meel uun baa go'ane.

Gaboodleyda gaashadu ku taal labada goonyoodba.
Ee maradu geyngeyman tahay guur aan ka la'aado.
Gambadh lagu fadhiisto iyo middaan gaadha fidinhaynin
Gaanuunka iyo xeedhada middaan goor allaba dhiibin
Gadhcaddaayadii reer tolkey taan u gogolhaynin
Een geedka laga naadinhayn guur aan ka la'aado.

Gaadhgaadhka awrta iyo nirgaha geela laga reebay
Gurijoogga xoolaha middaan goosanka u diidin
Een garannin soo dheelan ee guriga uun joogta

Gudbantaan halkayguba goleyn guur aan ka la'aado
Allow giirka iyo afka iyo ganafka taageysa.

Oo qoolka uun kula galdi'i magac waxay gaadho
Gendhihii midduu wada nacay ee gacalka fiigaysa
Goolbootadii laga samray ee goysey ubadkeeda
Intay dhiig ii soo gelin lahayd guur aan ka la'aado
Geddiga hayaanka ah middaan gaadhin weligeedba.

Ee gabanta loo wado sidii goodir noo curtay
Waa geeri naagtaan ratiga kuu gadhqaabanhayne
Reerkoo gawaan degey dadkoo gibilladii waabtay
Anoo galangalciyo oon la gugan furayna gaadiidka
Geedaha haddii lala dhexgalo gudimo oodeedda.
Galoon badhaxa uma dhaamin karo geeddantadan jaane
Guul iyo cidla' yey igu wadaa gooh aan yuururo
Gosha laga cabsoon iyo xidhkay gooshu ka adeegi
Gaadiyo intay bahal i siin guur aan ka la'aado
Middaan cawska soo guran aqoon garab ku boodhleyda
Gelgelin jiifta bacadka uun galgalan gu' iyo jiilaalba
Ee golaha qoyska iyo minkaba siigadu isgoysey
Ee giir-yar baa cunay odhan guur aan ka la'aado
Galoolka iyo cawska yuu badhkood gune ka gooyaaye
Garbadhuubanta aan laga deyeyn gale inay laabto.

Waxay hooyadeed garab degto oo la i gargaaraba
Mar haddaan ka guurana hadday biidna garanweydo
Gabbood kob aan lahayn kuma gamee guur aan ka la'aado
Midda gaabana ee garabka iyo guurku wada joogo
Ee socodka uma gaatiso e giririflaynhaysa.

Ee guro ma laacdo ee ratiga juu ku gacangoysa
Jambadh gibin ah oon golos ahayn guur aan ka la'aado
Carmalkii hortay guursatay ee geedo soo shidatay
Oo iga gu' weyn oo taqaan gaadmo iyo dhuudmo
Waxay gogosha ii saxartirto oy ilaxidh gaysaaba.

Dhawr habeen kolkii lala golyo oo gaax la kala maalo
Gadaal bay la soo bixi dabarro horowgu gaaraaye
Intay galab i aynabi lahayd guur aan ka la'aado
Dumaal gaban leh gaayaatufley waa mas geed galaye
Haddaan wiilka guulguulo way igu guhaadoonne

Waa gool dhashii haysatee guur aan ka la'aado
Maradaan u galay khaylidaan gu'gakan soo iibshey
Garba-saar haddaan ugu dariyo boqorro giirgiiran
Golma-xidhato ganca uun baannayn guur aan ka la'aado
Galbashada dharaartii middaan gaadhka iga eegin.

Aan garannin goortii wakhtiga aanan gefeyn reerka
Een guurahaygii milshiyin aar gudaan ahaye
Anoo lugo-gorgoray taagnid gogosha oo laaban
Intaan ciil la gow odhan lahaa gaadda iga haysa
Ama aan goor xun daydayan lahaa guur aan ka la'aado.

Gabdhahoo ciyaar tuman raggoo yara dul goocaaca
Golostay u jeedeen hadday guruca soo saarto
Waxay guuntu booddo oy ciyaar daba gebleysaaba
Goobtii middii lagula hadhay geedka dhiniciisa
Gadhacleyda, geelada irmaan guur aan ka la'aado
Tallaabada middaan gaw ka siin gooray soconayso.
Een gola-baxayn oo xarrago gacanta saydhaynin

Oon dumarka gaarsiin giddigii gabadha loo aayo
Raaliyo garaad badan middaan iba guhaadeynin.

80. Adaan gacanta kuu horsadee hay gefsiin caawa.

**ERAYO LA SHARXAY OO GABAYGA KU JIRA**

Fure: Tirada ereyga ku lammaani waxa ay muujinaysaa tuducda uu ereygu kaga jiro gabayga.

1. Gebileeye-murugo e
3. Gaarraaye-daboollaa
7. Gole ka fuul-ku boodis, iska hubsasho la'aan
8. Gaanka-weynaa
12. Gulaalmaa-hallaabaa
14. Gaashadu ku taal-Wasakhda boogta noqotaa ku taal
15. Geyngeyn tahay-baro wasakh ahi ay ku yaalliin
16. Gaadh-gogol yar, saan la goglado
25. Galdi'iusha ayey la dhici
25. Qoolka-bud
26. Fiigaysa-wada crida
35. Galoon badhaxa-dhiil caano iyo biyo isku jira lagu shubay
36. Gooh-cidla dhaxan badan
42. Giir-yar sac
44. Gale-caws hawsha uun in lagu qabsado loogu talo galo qurux caynkaasana aan looga jeedin
47. Gabbood-dugsi
50. Guro-awrka raran, meel dhexda ah oo laga sameeyo oo carruurta yaryar, maqasha iyo wiciyaddaba la saaro
50. Laacdo-tiigsato.

3. Gelmidhabadka-degganaan la'aanta
4. Gufaacoome-lahan ama ladh igu soo kiciyey

**I. Weydiimo :**

1) «Goboodleyda gashadu ku taal labada goon-yoodba ee maradu geyngeyman tahay guur aan ka la'aado».

b) Sharax labada tuduc.

t) Sidee bay labadaa tuduc u muujinayaan si Soomaalidu aad u tixgelin jirtay nadaafadda, gaar ahaan xagga dumarka.

j) Keen tuduc ama laba tuduc aad ka maqashay maansada Soomaalida oo ka hadlaya nadaaf-adda xagga qofka jidhkiisa, iyo hugiisa; ama xagga qalabka iyo weelka guryaha lagu isticmaalo.

II) Gabaygu wuxuu tilmaamay sifooyin door ah oo naagta aan lahayn aanu guurkeedu wanaagsa-nayn; magacaw sifooyinkaa. marka loo eego noloshii Soomaalida ee miyiga sidee bay lagama maarmaan u ahayd in naagtu sifooyin-kaa lahaato.

t) Nolosha maanta aynu ku noollahay waxba ma iska beddeleen xagga qiimaynta haweenka marka loo eego sifooyinkaa gabayaagu til-maamay ?.

j) Wax ka sheeg waxyaalaha ninka lagu qiimayn jiray. (Isbarbardhig gabaygan iyo gabaygii «Baroor Diiq» Cali Jaamac Haabiil. Buugga Suugaanta Fasalka 1aad, Bogga 22 — 23).

III) Gabayaagu wuxuu tuducaha 48-51 ku sheegay in aanu jeclayn naagta gaaban guurkeeda. Waa maxay sababta uu sidaa u leeyahay ? Dheeri iyo gaabni ma loo eegaa dumarka maanta ? Ujeed-dada gabayaaga iyo fikradda khaladka ee ah in qofka bani'aadamka lagu qiimeeyo sida jidhki-isu u dhisan yahay, maxay ku kala duwan yihiin

IV) Dulucda gabayagu waxay si gaar ah ugu kooban tahay talooyinka san ee lagu raaci jiray haweenka Soomaaliyeed. Taa ka sokow wuxuu gabayaagu hodan ku yahay bixinta uu bixinayo sawir balaadhan oo nolosha dadka Soomaaliyeed ee reer miyiga ah. Adiga oo markaa taa ka faa'iideysanaya si gaaban uga hadal nolosha reer guuraaga; isla mar ahaantaa barbardhig ta beeraleyda.

V) Sharax erayada soo socda: Gendihii, goolbootadii, naadinhayn, gibilladii, galoon badhaxa.

## CASHARKA II

## TODDOBAATAN IYO TOBAN :

*(AADAN - GUREY MAXAMED CABDILLE 1840 - 1920)*

Markii gabow la soo qaado, geeri ayaa la xasuustaa oo maskaxda ku soo dhacda, qofkii gaboobana waxa loo filaa in noloshiisii idlaatay oo uu berri ama saaddambe midkood iilan doono.

Dadka aftahanka ahi kolkii ay gaboobaan wax badan ayaa ay gabowga ka yidhaahdeen; haddii ay Soomaali yihiin iyo haddii ay shisheeye yihiinba. Aftahannada Soomaaliyeed oo gabowga wax ka yidhina waxa ka mid ah, Salaan carrabey iyo Aadan-Gurey Maxamed cabdille. Salaan isagoo oo gabow ka calaacalaya waxa uu yidhi :

Nin cirradu lammaanaha dhigtoo laylyan baan ahaye
Lixdan labiyo toban baan kor maray waana la hubaaye
Lafta dhabar lixaadka i debciyo laafyihii gacanta
Lubbidaydu layl xalay ma ledin laadadyiyo taahe
Waa taa lalleemada indhaha araggu liitaaye
Liiqliiqad baan ahay sidii lulo dabayleede !

Haddaba, waxa aan lagu murmin karin in gabowgu ugu dhibaato badan yahay kolkii ay qofka jirro ugu darmato, xoolo yaraanna la soo daristo. Taasina waxay la soo gudboonaatay Aadan-Gurey Maxamed oo gabaygan soo socda leh. Aadan wuxuu dhashay 1840kii, waxaana lagu male weyn yahay in uu Ximan iyo agagaarka Dhuusa-mareeb ku koray. Waxa lagu tilmaamay inuu ahaa nin gabay murtiyeed leh. Wuxuu geeriyooday

labaatanaadkii qarnigan haatan aynu ku jirno. Gabaygan oo aan ku dhamayn intan aanu ka soo qaadnay wuxuu tiriyey markii uu duqoobay, isagoo, markaas, xasuusanaya sidii uu beri ahaan jiray. Wuxuu yidhi :

Toddobaatan iyo toban, miyaan tiriyey waageyga
Sidii wiil tarrada ceel marshoo timaha deebeeyey
Tin madow miyaa laga deyey aniga tuurkeyga
Ma tallaabadaan la cabsadoo tiigsi lugo moodey
Ma tukubey sida habar tu kale tuugmo ugu jeedda
Tafmadaw haddaan qaadan jirey maro tilmaan dheer leh
Tartarrada ma libir baan ku xiray taako labadeeda
Aqal tiirar weyn kama harsado talagga dayreede
Sidii tuduc haldhaa wado miyaan ciidda tumayaystay
Barkin luqunta kuma tiirsho iyo tolane baarkiise
Ma dhegtaan tagoogada gashaday sidii anoo tuuga
Toglo iyo Gidheys baan ku qabey dhiisha ii tolane
Turuqii miyaa iga ba'oo haraggu soo tuubmay
Taf miyaanan rogahayn sidii cudurku ii taabtay
Torogse waayadaan fuuli jirey tahanti weynayday
Colka-tiirshe anigaa ahaa taajirnimadiiye
Guuraha anays taagi jirey idil tilmaanteede
Haddaan weerarkeedii tognay oo toon ka soo didinnay

Ibo-toosanleeyey waxay na hor taslaysaaba
Tog biyo leh haddaan keenno oo koron ku taysiinno
Tiicay wadaageed haddii rag isku tuurtuuro
Sidaan wax u tabayn jirey miyaan taabi kari waayey !

**Weydiimo :**

1. Qofka gaboobaa muxuu cibaadaysi iyo Eebbe tuug ugu go'doomaa ?
2. Dadka kuwee sheekada waayeelka jecel ?
3. Ma Soomaalida keliya gabowga wax ka tiri? ma taqaan gabayaa shisheeye ah oo isla arrintaas ka gabyey ?
4. Magacow labo nin oo Soomaali ah oo gabowga ka gabayday ?
5. Goorma ayuu gabowgu ugu dhibaato badan yahay
6. Salaan Carrabeey iyo Aadan-Gurey labaduba da'dooda waxay ku sheegeen gabayadooda. Kee da' weyn? Midkood bana immisa jir weeye ?
7. Muxuu Aadan-Gurey socodkiisa ku tilmaamay ?
8. Tuduca tobnaad iyo midka xiga laqbee ?
9. Gabayaagu wuxuu gabaygiisa inoogu sheegay inuu weyd yahay? Sheeg tubacyada taas ka hadlaya
10. Labo tuduc ayuu Aadan ku sheegay inaan madaxi-isa tin loo aqoon. Waa labadee ?
11. Tuducan laqbee :
    Ma tallaabadaan la cabsadoo tiigsi lugo mooday
12. Isku day in aad erayadaan hadallo aad leedahay ku laqbayso.

Tartarrada, haldhaa, tegoogada, taalays, koran.

*Sharax erayada :*

tiriyey waagayga: tiriyey da'dayda
tarradaa ceel: waa dhoobo cad oo reer miyigu timaha marsadaan si ay ugu xarragoodaan
deebeeyey: dambas mariyey si timuhu u casaadaan
tuurkayga : dushayda
tiigsi lugo mooday: lugaha soo koga oo aan si fiican dhulka u gaadhin, buu u jeedaa
ma tukubay: ul-dheer ma cuskaday
tuugsi : dewersi, tafmaday : macawis fay madaw
tartarrada : feedhaha hoostooda, libir : furin yar
talagga dayreed : xilliga dayreed
tuduc haldhaa wade : koox gorayooyin ah, haldhaa : gorayga
tolane : waa gogol ka samaysan dun iyo caws oo qurux badan
waxana sameeya haweenka reer miyiga
dhegtaan tagoogada gashaday : gacantaydaan barkaday
Toglo iyo Gidhays : waa laba meelood
turuqii : muruqii weynaa, tuubmay : balqay
torogse : faras magacii, lognay : bognay
Toon : meel magaceed, ibo-toosanley : waa hasha naas-aha wanaagsan
taf miyaan rogihayn : naag mayaanaan hunguraynayn
na hor taslaysaaba : na hor oroddaaba
koran : awr gool ah oo dhufaanan
taysiinno : neefka geela marka la soo qaado ay qashaan waxay yidhaahdaan waannu ku taysiinnay ama ku dannabaynnay
tiica : hal magaceed
wadaaggeed : qaybteed
tabayn jiray : xeeladayn jiray

## CASHARKA III

## TOLOW HA LAY DHOOFSHO

*MAXAMED KAAHIN FEEDHOOLE*

Maxamed waxa uu ka mid yahay gabayaaga Soomaaliyeed, wuxuuna ku dhashay hawdka Burco bilaaddii 1928; waxa uuna ku koray oo ku barbaaray geeljirnimo. Isagoo aan weligiis magaalo u degin ayuu 1946kii tegey Cadan. Halkaas oo uu damcay in uu shaqo ka raadsado. Ayaandaarrose waxa ay noqotay isaga oo halkii uu tagaba la weydiiyo waxa uu yaqaan iyo shahaadada uu haystaa nooca ay tahay. Isaguna geeljir buu iska ahaa ay markaas uun ku dhalatay in uu magaalo u xoogsi tago.

Muddo markii uu joogey, shaqana ka gadhow siin waayey; suuqiina uu ku xumaaday, ayaa uu habeenkii dambe gabay calaacal ah gaaf ka mariyey. Isagoo dadkii halkaas isugu yimid weydiisanaya in ay lacag u ururiyaan oo magaalada ka dhoofiyaan.

Maxamed gabaygaa uu mariyey waxa uu kaga sheekeynayaa in isaga oo geeljire ah oo hawd guntii jooga uu maqlay in Soomaali badani ay joogto Tawaahi oo Cadan ah. Halkaasna ay lacagtu iska dhooban tahay oo qofku uusan marnaba shaqo iyo lacag toona ka waayeynin. Hase ahaatee, kolkii uu magaaladii yimid ayaa ay u caddaatay in qofkii aqoon lahayni uusan heli karin shaqo dhaafsiisan kuulinnimo iyo wixii la mid ah oo aan iyaga dheef buuran laga helaynin.

Waxa kaloo gabayaaga u caddaatay in magaalo-iska jooggu uu yahay saaqidnimo tan ugu weyn ka dib kolkii uu la kulmay dhallinyaro badan oo aan wax shaqo ah haynin oo intay jeegada soo wada jartaan, timaha dhan u wada fidhaan oo cawaandi jeexdaan, dhar nadiif ahna soo wada qaataan, gabbal dhacay iyo waa beryana

nadba suuqa dhinac u raacaya; kolbana baar hortiis uun ka sheekaynaya oo aan tamar kale lahayn.

Maxamed isagoo arrintaas ay dhallintaasi ku jirto yasayana, kana cabsi qaba in uu sidooda oo kale noqdo haddii aanu shaqo degdeg ah helin ama dalka iskaga dhoofin, kana calaacalaya tacliin la'aantiisa aanu hore wax u barannin, ayaa uu gabaygan ku yidhi :

Tixda gabay beryaa Maxamadow, waanigaan tirine
In dhoweydba waa taan ka tegey, ta iyo wowgeede
Ma tilmaamin maansooyinkaan, teeb garayn jiraye
Xaluun baan tewelay goor dhaxay tahay allaylkiiye
Markii uumiyuhu wada tarquday tamanni lay keenye
Tu'alifka oo dhacay hurdada, taw ka soo idhiye
Waxaan tebayo mooyee qalbigu taam i noqon waaye
Tusaalaha adduun iyo walaac, la igu soo tuurye
Togyar iyo Bannaan iyo anoo Tubnaha ka baaqaaya
Talloolayaal iyo anoo, taaggi Siraw jooga
Toomaha Walwaaleed anigoo, Torog ku maalaaya
Anigoo tusmada reerkayaga, talada goynaaya
Taajkiyo garoomaha anigoo, laygu wada tiirshey
Ayuun baa la ii tumay durbaan, taarna ii yimide
Dabadeed tallaabo iyo orod, taw u soo idhiye
Tamuunkii ku imid meel jinnaan, lays temmadinayne
Tawaahida waxan lahaa fuluus, tuulan baad heliye

Tabtaan ku arkay iyo caynkanay, tahay ma moodeyne
Waxa toban kun tamar-laawe, aan tacabba eegayne
Talaatiin gu' qaar joogay baan toob u xaasiline
Tanna xoogsi kama soo taraan, taana laga waaye
Taf la jiido iyo bay hayaan, tookha dibadeede
Teys ma laha taaloogga iyo, tima la xiiraaye
Aniguna tabtoodii haddaan tacallimaayaaye
Mar haddaanan teeb iyo waraaq, taybal dhiganaynin
Turjubaan afkiisii haddaanan, uga tiraabaynin
Far haddaana Faaltuu tegiyo, Turugsi raacaynin
Kol haddaanan telifoonka iyo, taarka ku hadlaynin
Marse hadduu tabtaa yahay raggii, teedhi seben joogey
Way talo xumaan xoogsigaan, tan uga jeedaaye
Tacliin wuxuu i baray aabbahay, tooyad soo godole
Tiska oodda iyo baan aqiin, tirada xoolaye
Intii aan tuldaha jaan wadwadey, rag iga tooreeye
Waxba gabaygu yuu ila tafine, waxaan ku taalleeyey
Mugga waan tegayaa haddaan, taabo nooliga e
Tabantaabo gacal baan rabaa, tolow ha lay dhoofsho.

**Weydiimo :**

1. Waa maxay sababta gabayaaga Cadan geysey ?
2. Dhallinyarada uu dhaliilay muxuu ku arkay ?
3. Muxuu shaqo u waayey ? Muxuuse yiqiin ?

4. Gabayaagu mar wuu faanay, marna wuu calaacalay, marna wuu baryootamay. Sheeg tuducyada muujinaya.
5. Gabayaagu wuxuu tixdiisa ku darsaday dhawr eray oo Carabi iyo Ingiriis ah. Maxaa ugu wacan malahaaga ?

*Sharaxa erayada :*

Jeegada : Qadaadka, madaxa sii-jeedkiisa
Cawaandi : timaha dhinaca laga kala jeexo
Yasaya : hoos u eegaya, xaqiraya
Tewelay : fakiray, isla faallooday
Tarquuday : seexday, eray asalkiisu Carabi yahay
Tamanni : hammi, feker badan
Tu'alif : labo iyo toban, eray Ingiriis ah
Walaac : warwer, calool-xumo
Tusmada : (1) habka degista reerka (2) Arrinta reerka
Teedshey : daayiyay, sharraxay
Tamuumidi : orod, soof u cararid
Temmadin : qaddarin, sharraxid
Tamar : tabar, awood
Taf : maraada dacalkeeda
Toob : shaatiga dumarka, dharka haweenku kor ka gashadaan
Tookh : faan been ah
Taaloog : jeegaxiir
Teys : dhadhan, eray asalkiisu Ingiriis yahay
Faaltuu iyo Turugsi : labo markab magacyadood
Taalleeyey : joojiyey, taallo uga dhigay
tabantaabo : kaalmo, caawino.

## CASHARKA IV

*GEELA : CUMAR MAXAMAD OSTEELIYE*

Cumar Maxamed (Osteeliye) waxa uu ku dhashay, kuna barbaaray miyiga gobolka Waqooyi Galbeed. Dabadeedna waxa uu noqday badmareen ku soo wareegay meelo badan oo adduunka ka mid ah. Ugu dambayntii waxa uu u shaqayn jirey Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha, gabayadiisa oo caan ahaana, in badan waxa laga sii daayey idaacadaha dalka, gaar ahaan Idaacadda magaalada Hargeysa.

Gabaygan waxa uu, si waayo-aragnimo gaar ihi ugu dhafan tahay ku muujinayaa sida geelu u yahay laf-dhabarta xoolaha dadka Soomaalidu ay dhaqdaan. Wejiyada badan ee qaayaha geela uu ka muujinayo waxa ka mid ah :

1. Sida geelu ugu dhaqmi karo dabeecadda adag; taasoo uu adhiga iyo lo'daba kaga roon yahay.
2. Waxtarkiisa, siiba caanahiisu faa'iidooyinka badan ee ay leeyihiin.
3. Sida loo dhaqaaleeyo, wakhtiga barwaaqada ah iyo wakhtiyada kaleba.
4. Quruxdiisa.

Talo : Gabayga waxa aad ka dhadhansan doontaa ammaan xad-dhaaf ah oo uu Cumar geela kaga korraysiinayo mood iyo noolba; dadka Soomaalida cidda aan lahaynna uu caydh ku tilmaamayo. Taa waa in loo arkaa in ay ku qotonto aragtida Cumar oo haddii runtii loo sii dhabbogalo noqonaysa mid jacaylka geela uu u qabey uun ay ka indho-tirtay faa'iidooyinka kale ee mood iyo noolba dhaqaalaha kale dadkeennu ka helo.

Dhudaha gabayga haddaan Maxamadow dhuuxa ka abbaaro

Abidkeyba xarafkaan dhigaa dhaxal-gal weeyaane
Anigoo dhallaanaan xafiday dhihintinkiisiiye,
Caawuu gadhkaygii dhafmay uu dhabannaday buuxshey
Inuu xarafku iga dheeliyaa waa dheg xumo weynee
I dhegeysta caawana tix waan dhaabadayn jiraye.

★ ★ ★ ★

Adhi waa dhallaan iyo haween dhimaradiisiiye.
Dhaldhalaalka iyo ciirtu waa dhuubka karameede,
Dhaqaalaha haweenka iyo guryaha siima dhaafsana e
Lo'da dhiiqda laga maalayo iyo dhayda iyo xoorku,
Dhudhunkay biyaha kula jirto iyo dhabarka weeyaane
Mar hadday abaaruhu dhacaan dhimatay geesleeye,
Ragga laxaha sii dhawrayaw dhaqasho waa geele.

★ ★ ★ ★

Dhibaatiyo adoo gaajo qaba dhaxanta jiilaalka
Dhoor caano laga soo lisoo yara dhanaanaaday
Nin dhadhamiyey wuu garanayaa dhul ay qaboojaane.
Goortaad dhantaabaa jidhkaba dhididku qooyaaye
Ragga laxaha sii dhawrayow dhaqasho waa geele,
Dheeraad u raaciyo bilay dhacaarta Hawde,
Iyadoo dhinbiishii Suudiyo dhilatay Maygaaga
Iyadoo dhammaan wada rintoo dhaaddan oo quruxsan
Oo farawga oofaha ku dhigay, dhinacu goobaystay,
Iyadoo dhaweysoo candhiyo, dhays la socon weydey,
Ayey jeelka kama dhawrsatee danaha xiistaaye
Dhabbaduu ku soo ururiyaa dhoobigii jiraye,
Markay dhawr habeen soo dhaxday, dhamal timaaddaaye
Dharaar bay carrada joogsataa ooy dhegadka ruugtaaye,
Habeenkaa waxa laga dhiijiyaa dhay habeed badane,
Ragga laxaha sii dhawrayaw dhaqasho waa geele,

Dhag-salaaddu goortay tidhaa bay dhacanta jiidhaaye,
Dhismaha naadhka iyo wiilashay laba u dhiibaane
Goortay dhagaxa malkada, shiisha iyo dheenta lagu tiirsho
Sidii faras dhanbaal culus sida ayay kala dhaqaaqdaaye,
Markay soo dhawaatay kalgacal dhudi la yeedhaaye.
Markaasay dhegeystaan kuwii ceelka loo dhigaye,
Dhaqso waxay ugu dhacaan kaalintay dhebi u xaadheene
Ma dhursugo irmaankoo wax badan dhanaha moogaaye,
Dhaltida iyo ratiga baarqabka ah ay dhibidu suudhaysay
Dhaqso waxay u keenaan qotida dhaqayadeediiye
Heesteeda nimanbaw dhignaa dhooy la'aan jiraye,
Dhallinyaro hormada loo dhigay oo timaha dhoobaystay,
Sida nimanka dhaantada tuma ayey ugu dhawaaqaane
Dhufashada hadhuuhgallada ayaa la isu dhiibaaye
Markay dheregto ayaa meel burca ah dhool la tu'iyaaye
Sida dhaan haraad loo qabay ugu dhaqaaqaane
Markaasaa dhulku joogi jirey lagu dhaqaajaaye
Xeryo guulkii hore loo dhigay dhag uga siiyaane
Waxa dhaba habeenkaa ninkii dhama galxoodkeeda,
Dhallaannimo qodxihii kugu mudaa kaaga soo dhaca e,
Ragga laxaha sii dhawrayaw dhaqasho waa geele.
Waxay sii dhawaatab kolkay Idhamadii dhaafto
Halka dhuubka caws looga helo, ayay uga dhex oodaane
Iyadoy horraantii dhashoo dhiraha loo waabay,
Oo aad dhogorta qaalmaha xariir dheehan ku astayso
Ayaa dhool gu'oo soo onkoday, dhibic ka hooraaye,
Markaasay xeryaha uga dhigaan dhinacsinkii howde,
Dhaldhalaal magaaliyo bariis malaha dheecaane.
Jiilaalku reera uu dhibay, bay dhool ku hoyataaye
Markaasay karuur kaga dhigtaan dhiilo baalidaye

Inkastood adduun badan dhaqdo, dheeman iyo daaro,
Inkastood dhar wada suufa iyo dhag iyo laas qaaddo
Dhaxal male, nin Soomaaliyoon dhaqannin koorreeye,
Dhabbadii carraabaha markii nabar la sii dheelmo,
Dhoor wiilaw, goortuu ratigu dheeho dhabar joogo,
Dhudhunkeeda, laafyaha markuu, dhan ula boodaayo,
Dhegta iyo tawaadiyo xubnaha laysku wada dhaabay,
Dhudda kuruska beerkiyo kelyaha dhibidu geeshaysey,
Dhexda labada qaar noqotay iyo dhabarka soo xoodmay
Dhegaysiguu micida meel cidla' ah, dheef u rabinaayo
Dhaqaaq-joogsiguu sida libaax dhuunta ka higgoodo.
Dhufashada rakaadday farxadi kugu dhammaataaye,
Ragga laxaha sii dhawrayaw dhaqasho waa geele.
Ammaantiisa kuumaan dhammayn, kumana dheeraane,
Dhaayaha uu geelu leeyahay, haddaan dhool yar ka iftiinsho
Dhaddiggiisa lama iibiyeen lamana dhiibeene,
Dhool lama muquunsheen haddii dhowr lagaa xidho e,
Waa dhagax nafloo heejaddaa dhigay Ilaahaye.
Dhadhaab adag haddii aanu ka bixin laguma dhaarteene,
Waa dhabarka seedaha ku yaal sidigta dhaameele,
Wax kaloo ku dhaafaba rag ways kaga dhaqaaqaaye
Ragga laxaha sii dhawrayaw dhaqasho waa geele.
Dhugtanakiyo rasaastii madfacu dhiraha laynaaye,
Sida dhibicda shaydaanigay nagu dhawaaqaysey
Hadba dhuungalayntaan bunduqa kula dhawaanaayey
Aniguba dhexdeed, waxaan ku jirey dheeho tacabkeede,
Dhoor wiil u yeedhyeedh nimaan dhaqani waa caydhe.

**Weydiimo :**

1. Isu qiyaas qaayaha iyo waxtarka ay leeyihiin geela, lo'da iyo adhigu.

2. Gabayaagu fikradda uu arrintaas ka qabo ma ku raacsan tahay ? Waayo ?

3. Faallo kooban ka bixi macnaha iyo ujeeddada guud ee gabayaaga.

4. Dadka Soomaalidu fikradda berigii hore ay geela ka qabeen iyo ta ay maanta ka qabaan, siiba fikradda dadka reer magaalka ahi ay ka qabaan isu qiyaas.

## EREYO GABAYGA LAGA SOO XULAY OO LA SHARXAY

«Fure : Tirada ereyga ku lammaani waxa ay muujinaysaa tuduca ereygu gabayga kaga jiro».

1. Dhudda — laanta.
2. Dhimiradiisiiye — waxay kartidoodu tahay ee ay iyagu dheefsan karayaan.
8. Dhuubka — deegaanta.
12. Geesleeye — lo'da iyo riyaha.
13. Laxaha — idaha.
15. Dhoor — hal magaceed (halkanse geelaa loola jeedaa).
19. Dhacarta — dhir abaartu aanay waxba ka qaadin muud harraad tirana ay xooluhu ka helaan ayaa jiilaalkii xoolaha dhulka oomanaa ah ee biyaha ka fog ku hadha loo jafaa (loo jeex-jeexaa).
20. Dhimbiil — muuqa caleentay uga eg tahay kana adag tahay, midabkeeduna waa casaan, waxaanay ka baxdaa meesha ubaxu ka dhaco. Dhirta ay ka baxdo waxa ka mid ah qansaxa, galoolka iyo sarmaanta.
21. Dhaaddan — quruxsan.
22. Faraw — shilays.
23. Dhays — xagga sidka geela haddii laga eego waa astaan ka mid ah, astaamaha muujiya marka hashu

ay candhada soo riddo, dabarkuna ku soo joogsado ee ay aad u dhowdahay.

24. Jeelka — xiisaha geela ama xoolaha kaleba ku abuurma marka ay jeelaan oo ama carro ama milix u baahdaan.
26. Dhamal — hal magaceed (halkaa geel oo dhan baa loola jeedaa).
27. Dhegedka — gebiyada dixda xoolaha laga waraabiyo iyo dushoodaba, meelo dirri ah oo dhanaan laga helo lana moodo in saliidi ay ku dadaatay oo badanaa xooluhuna ay leef-leefaan.
30. Dhacanta — Oodda.
31. Naadhka — darka.
32. Shiisha — dhagaxa.
32. Malxeed — meesha xooluhu isutaagaan ee laga horo.
36. Kaalin — halka biyo waraabinta loogaga jiro.
38. Suudhaysay — wada dhammaysay, kana urayso.
39. Qoltida — irmaanka.
40. Dhooy la'aan jiray — barwaaqaysan, xoog ah oo aanay cidna iska war hayn.
41. Hormo — kolba kooxda xoolaha oonka ah laga soo horo.
44. Dhool — hal magaceed (halkan geel oo dhan baa loola jeedaa).
45. Guul — xoolaha aroorka ahi ku dhixidda ay ceelka laga waraabinayo agtiisa habeenka hore ku dhaxaan. Marka ay cokan yihiin dhicidda ay habeenka hore ku sii dhaxaanna waa la yidhaahdaa.
51. Idhamo — meel magaceed.
59. Baaliday — muddo iska oollaa oo aan waxba lagu shuban, dabadeedna u baahan in la safeeyo.
61. Dhag — dhar adkaa oo caddaa, badanaana raggu saraawiil qurux badan uu ka tolan jirey.

61. Laas — cumaamad xariir ah oo madaxdu ay qaadan jirtey.
64. Dhoorwiile — baarqabka.
64. Dheelo — hal magaceed (halkan geel oo dhan baa loola jeedaa).
66. Tawaadda — qadaadka awrta, gaar ahaan baarqabka, ee labnimada awgeed madoobaataa.
67. Dhudda kuruska — kuruska dhexdiisa.
67. Dhibidu geesheysey — kaadidu madoobeysey.
69. Dheef u raminaayo — miciyaha isla hanweynaa darteed isugu lisayso kuna dhoollatusanayo.
71. Rakaadda — doobta (codka sanqadha weyn ee baarqabku sameeyo).
74. Dhaayaha — qaayaha.
74. Dhool yar ka iftiinsho — wax yar ka sheego.
76. Lama maquunsheen — lama bixiyeen lamana iibiyeen.

## CASHARKA V

*FIIN : CALI XUSEEN*

Cali Xuseen Alla ha u naxriisto, waa gabayaa weyn oo, gabayga caan ku ah, gaar ahaan gabayada ku saabsan waddaninnimada. Muddo dheer waxa uu u shaqaynayey Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha. Halgankii gobannimadoonka dagaalkii Ummadda Soomaaliyeed ay u soo gashayna qayb weyn buu ka soo qaatay, isaga oo dadka ku guubaabin jirey gabayo qiiro leh si ay uga gilgishaan gumeysiga.

Gabaygan oo ka mid ah gabayadii uu curiyey markii halgankii gobannimada lagu jirey waxa ay ku wada hadlayaan shinbirta fiinta lagu magacaabo. Fiintaas, waxay Cali isku arkeen riyo, iyadoo aad u irdhaysan kana gubanaysa khayraadkii dalka ee gumeystayaashu iska guranayeen, dadkii Soomaaliyeed iyo xayawaankii dalka ku dhaqnaana ay ka qatanaayeen. Wuxuu yidhi :

Fiin yahay adaa ololaya oo oohin ciirsaday e
Haddii aan laguu imanin waad aamusi lahayd e
Maxaad aragtay waan kula qabaa uurkutaallada?
Waxay tidhi Ilaahay haddaad aad u garanayso
Oo aad Islaan tahay i daa waa irdhaysanahaye
Waxaan idhi qofkii i abhiyaa wuu ammaan heliye
Ashahaadda iyo waan aqaan aayaddii Nebiye
Ha yeeshee, ilmada kaa dhacdiyo umalka guudkaaga
In yar iiga sheeg waxaan rabaa inaan ogaadaaye
Waxay tidhi inkaar buu ku go'ay odaygii Soomaal e

Awladdii uu dhalayna waa siaa adoogoode
Hadday ul iyo diirkeed yihiin rag iska eegaaya
Afrikadan ma joogeene nimaan aabbe ku lahayne
Ayax kuma dhaleen kaymihii ubaxa weynaaye
Anna aydii aan joogi jiray kama abraareene,
Waxaan idhi irdi nalaga qaad aad ahaan jirey e
Waataa la kala iibsadaan nala ogeysiine
Ooddaaba laga goynayaa idhankii laasoode
Meeshaad ilmaa dhigan lahayd uun kalaa degey e,
Waxay tidhi dhulyahow eheleddaa ma laha iimaane
Ilaaleeyey oo dunida waa ugu il liitaane
Iyagaa ableyda isu sida eebo xoog badane
Intay ayro kala qaadayaan aarsanmahayaane
Waxaan idhi nin tiisaba anfacay agab haddaad mooddo
Umal iyo adoo gaajo qaba uu col ku eryaayo
Haddaad aqalka ugu soo gasho aad magan ku soo aaddo
Ul buu kaaga reebaa wixii kaa itaal badane
Ha ka eegin doqon kaama rido aar ku sii sida e
Waxay tidhi or beenaad waddaa ina Xuseenowe
Ugaas iyo qabiilnimo kuwii ubax ku faanaayey
Abtiirsiimadoodii kuwii laguu alhuumeeyey
Waataa albaabkii la yimi agabtu noo tiille
Miyaan maanta aafaadkan dhacay amarkan loo sheegin?
Waxaan idhi ilaaq bay hayaan edebna lays waaye
Afkuun bay ka tookhaan sidii ooryahoo kale e
Bootada ardaayada haddii aad asali mooddo
Aduun baa awaaraha ku lumi oo ilka caddeyne
Waxay tiri Ilaahay hadduu duul arrin u diido
Oo uu ibleys gebi ka rido sooma ururaane

Qalbigii engegey waanaduu orod ku dhaafaaye
Goormaa inkaartani heshay ee lagu alhuumeeyey?
Waxaan idhi arbiyo laguma oga geesi aynaba e
Iniinaha kelyaha iyo wadnaha iini kaga taalle
Aanada tolkood bawga roon uumiyaa kale e
Maxaan ararta kaga daalayaa edeg naloo goo ye ?

**Weydiimo :**

1. Gabaygani munaasabadda uu ku soo baxay iyo waxaad ka qabto si kooban uga hadal ?
2. b) Shimbiraha dhulkeena ku nool intaad ka taqaanno magacooda qor ?

   t) Fiinta faallo kooban ka bixi ?
3. Fiintu waxay ka gubanayso yaa geystey ?
4. Dadka Soomaaliyeed, sida fiintu qabto sidee ay gumeystaha dhulkooda khayraadkiisa guranayey uga adkaan lahaayeen ?

   Maxaase ay arrintaas suurto gelinteeda kaga jeed-een ?
5. Xabagta gabayga ku jirtaa maxay u taagan tahay ?
6. b) Edegga Cali leeyahay waa naloo gooyey waa maxay ?
   Yaa se dadka Soomaaliyeed edeggaa u gooyey ?

   t) Edeggu muxuu u taagan yahay ?
7. Gabaygani, gabayadii aad hore u soo akhriday, muxuu kaga duwan yahay ? Faallo kooban ka bixi ?

*Sharaxa ereyad :*

ciirsaday : miciinsaday
irdhaysanahay : naxsanahay; i abhiyaa : i dhaariyaa
umalka: cadhada; ul iyo diirkeed yihiin : isku mid yihiin
kama abraareen : kama carareen; aad ahaan jiraye : wanaagsanaan jiraye; idhankii laasood : meel magaceed; ugu il liitaan: ugu liitaane
ablayda : toorida; eebo : waran yar; ayro : hal magaceed
itaal badan : xoog badan; agabtu : alaabtu; tookhaan : bootada ; hadalka badan ee ardayda
arbe : waa maroodiga lab halkanse waxa looga jeedaa geesi; aynab: wax dila; aanada : godobta.

*Faallo guud :*

Gabaygani munaasabadda uu ku yimid waa dhaqdhaqaaqii gobannimadoonka. Waxa uuna Cali Xuseen kula sheekaysanayaa fiin. Fiintu waa shimbir ka mid ah shimbirraha dalka Soomaaliyeed, waxayna sheegtaa dhiillada, oo markay cido waxaa laga baqdaa col iyo shaqaaqo. Cali Xuseen waxa uu ka xanuunsaday gumeystayaashii dhulka Soomaaliyeed googooyey ee in yarba meel ku ooday khayraadkiisiina qaybsaday. waana sida uu u leeyahay «Maxaan ararta kaga daalayaa edeg naloo gooye».

Waxa kale oo uu Cali ka xanuunsaday isaga oo dhalliilay dadkii Soomaaliyeed ee markaa joogay qaarkood oo halkii gumeystayaasha ay kala dagaallami lahaayeen ee ay meel uga soo wada jeedi lahaayeen iyagii is laynayaan; qabiilooyinna u kala qaybsan yihiin. Sidaa darteed suugaanyahanku wuxuu goostay inuu dadkii kiciyo oo baraarujiyo dantoodana u sheego. Jaalle Cali wuxuu adeegsaday si dadka uu kiciyo in uu la sheekaysto shimbiraha fiinta taas oo cideeda dareenka Soomaalidu deg-deg ugu kaco.

Halkaa waxa aad ka arkaysaa fiintu, oo uu ka hadliyey, ooyeysa, magan gelyo doonaysa, cadaawaha ha layga rido leh, iyo isagii oo tirtirse ahaan dadkii dhaliilaaya oo leh «Fiin yahay ha is daalin, dadkani waxba kuu tari maayaan, iyaga ayaa isku jeeda, iscunaya, shisheeyaha geesiyaal uma aha, oo ma dili yaqaanaan».

## CASHARKA VI

### *GUUGUULE : ISMAACIIL MIRE*

Waxa la wada ogsoon yahay nolosheennu in ay ku xidhan tahay roobka. Ta beeraleyda iyo xoola-dhaqatada ku nool meelaha biyaha (webiyada, durdur-rada, ceelasha iyo ilaha) ka fogina ay si aad u laxaad leh ayaa dadka iyo duunyadaba ku qabsata haddii roobku ku yaraado ama kuba di'i waayo meelahaas.

Sida ka dhacday (1975) gobollada Togdheer, Sanaag, Nugaal, Bari, Galgaduud iyo Mudug.

Taariikhdu waxa ay inna xusuusinaysaa in abaaro badan oo roob la'aan ka dhashay ay nabarro waaweyn u geysteen dadkeenna noloshiisa. Abaarihii ina soo jiid-hay waxa ka mid ahaa Jiitama, Jaahweyn iyo kuwo kale oo fara badan. Ismaaciil Mire, markaas, isaga oo abaar-ahaa mid ka mid ihi waxyeellada ay geysatey taariikhda cidhif ka gelinaya ayuu gabaygan curiyey. Mar isaga iyo nin kale oo ay wada socdeen ay la kulmeen guuguule ciyaya. Wuxuu yidhi :-

Guuguliyow haddaad guga u ooyeyso
Haddaad mooddey keligaa inuu gubayo jiilaalku
Ama aad gabooyaha ku madhan gama' la diideyso
Giddigood addoomaha waxa gaadhey nabar weyne
Abaar (gaag) mareebaa dhacdiyo gaatamoo kale e
Gartaa maaha keligaa inaad gaar u cabataaye
Gumeys cirro leh baan ahee war aan ku gaadhsiiyo
Geeli adduunka u adkaa gobollo naafowye
Golihii ka kici waa raggii geydho hayn jiraye

Tuuladuu il gabadhlaynayaa gobol barbaartiiye
Hadduuna timirta goob dhigi lahaa jiingadday gelinne
Ninna uma gargaareen haddaan gaadhka laga hayne
Gumburigii badh baa joogsadiyo gorayo-cawshiiye
Saryaankii garbaha weyn lahaa goob ka kici waaye
Wuxuu goonidaaqii habsadey gubaddaadii hawde
Garannuugta iyo deeradii gaag yar baa hadhaye
Gobey iyo askari geyllan baa goodirkii jaraye
Guuyadiyo jiiskii hadday kala golwaayeene
Kama guuxo aargoonlihii geliga Toommoode
Shabeelkii gabraar lagu idlee giiro layn jiraye
Oo godadkii kama soo ciyaan gabannadiisiiye
Hargihiisii nimankii gataa guuldarraw sidaye
Gaadiidkii la dhaansanahayiyo giidhaygii madhaye
Ahminkii la gawrici jiriyo gaabay adhigiiye
Goggii subagga laga dhoobi jirey haatan gorofaadye
Basaas baa timi kala go'een gaaridii dumar e
Gorgorkiyo dhurwaagii laftaad galayax mooddaaye
Neef kama gurxamo dooxadii garada fiicnayde
Garoowe iyo Bookh baa haraad qaar u go'ayaane
Gocondho iyo daal bay qabaan garaw la'aaneede
Ayaxii geyiga joogi jirey guuto lagu saarye
Gubniyaa hareeraha ka galay gaadhiyaal wa da e

Geedihii sunbaa loogu daray geerinaw badaye
Wax ma galabsannine maalin baa loo guddoonsadaye
Galowga iyo fiintii naf bay giida la hayaane
Gurxankiyo cabaadkiyo haddaad gooha demin weydo
Adigaaba lagu qaadayaa gooshkan dabadeede
Gaagaabso oo aamus yaan gaadh lagaa qabane

**Weydiimo :**

1. Ujeeddada guud iyo macnaha gabaygan soo koob ?
2. Ismaaciil sida uu gabaygan ku curiyey iyo ujeeddada uu ka lahaaba ka hadal ?
3. Toddobada tuduc ee ugu horreeya soo koob magacooda guud ?
4. Sida uu gabayaagu ku muujinayo tuduca lixaad ma ku raacsan tahay ? Waayo ?
5. Si kooban uga hadal abaartu sida ay u gashay ?
   b) Xoolaha (dabajoog iyo dibadjoog)
   t) Dadka
6. Shabeelka yaa u horseeday guuldarrada ? Waayo ?
7. Timaha dumarka basaastoodu maxay kuu muujinayaan ?
8. Ayax ma hunguri baa dadka u geeyey ? Ka hadal.
9. Saddexda tuduc ee gabayga ugu dambeeya :
   b) Ismaaciil muxuu guuguulaha ugu sheegayaa ?
   t) Ismaaciil sida uu guuguulaha ka rabo ma ku raacsan tahay ?
10. b) Maxaa abaarta keena ? Meeqa abaarood oo dalka soo jiidhay baad garanaysaa ?
   t) Abaarta dhacday (1974 - 75) dawladda Kacaanka ah iyo dadka Soomaaliyeed ee meelaha abaartu aanay ku dhicin ku nooli maxay ka qabteen ?
   j) Yaa kaloo wax ka qabtay ?

12. Waddammo kale abaaro ma ka dhaceen ?
    b) Abaartu maxay inna baraysaa ? Maxaa isbed-del ah oo u eg in aynu ku sameyno nolosha xoola-dhaqatada ?

*Sharax ereyada :*

1. Guuguule: Shimbir shimbiraha ka mid ah
3. Gabooyaha: Waa alaab ninka ugaarsada uu ku gurto fallaaraha kana samaysan qori iyo saan, hase yeeshee, gabayaagu halkan waxa uu ugu jeedaa caloosha.
4. Nabar weyn: Dhibaato weyn
4. Gaatama: Abaar magaceed
7. Guumeys cirro leh baan ahay: Waayo-arag baan ahay
9. Golihii: Ardaagii; geydho: Hal magaceed
13. Gumburi: dameer dibadeed; goraya-cawl: Gorayada dhaddig
14. Sarayn: Biciidka lab
15. Habsaday: Fadhiistay
16. Gaag yar: Gobol yar
18. Guuyo: nooc sagaarada ka mid ah
    Jiiskii: Sagaaradii dhasha ahayd
    Kala golwaayeen: Kala quusteen
19. Aargoonle: Libaax; geli: Qol jaamo: Meel magaceed
20. Gabraar: Ugaadhsi; giiro: Ri magaceed
24. Ahmin: Waa xooluhu marka ay naaxaan
25. Goggii: waxa looga jeedaa halkan qumbihii saanta geela ka samaysnaa ee subagga lagu shuban jiray
26. Basaas: dufan la'aan
27. Laftaad galayax mooddaa: lafahoodii oo cadcad baa daadsan
28. Garada fiicnayd: dareenka fiicnayd; galawga iyo fiintu; waa isku mid, waana shimbir shimbiraha ka mid ah, oo dhiillada ka sii oyda

35. Giida la hayaane: la ooyayaane
37. Gooshkan dabdeede: doorkan dabadeede.

*FAALLO GUUD :*

Soomaalidu waxa ay ka gabyi jirtay dhinacyo badan sida: dhinaca ammaanta, cayda, habaarka, baroorta, falsafadda, xigmadda, jacaylka iyo kuwo kale oo badan.

Ismaaciil Mire gabaygan waxa uu kaga hadlay falsafadda oo aan Soomaalidu ka hadli jirin wax yar mooyaane. Waxa uu si wanaagsan u dareemay dunidii uu markaa ku noolaa xaaladdeedu sidii ay ahayd.

Xaaladdaa iyada ahna waxa uu damcay in uu dadka dareensiiyo oo indhohooda ku soo jeediyo, oo ku baraarujiyo, maxaa yeelay suugaanyahanku dadka hortii buu wax arkaa Suugaantu waxa ay sawirtaa deegaanka suugaanyahanka. Sidaa darteed gabayga Ismaaciil Mire waxa aad u arkaysaa baadiyihii uu ku noolaa astaamihii sida dugaagga wax cuna ee ay ka mid yihiin dhurwaaga, shabeelka, dacawga, iyo xoolaha la dhaqdo ee ay ka mid yihiin geela, ariga, lo'da; iyo ugaadha ay ka mid yihiin, biciidka, goodirka, gumburiga, deerada, sagaarada, iyo qaar kale oo badan.

Ismaaciil Mire dunida wixii ka dhacayey in uu sawiro markii uu doonayey waxa uu ku halqabsaday guuguule ciyaya. Abaarihii dhacay iyo camalkii gaalada ee markaa xoogga lahaa labadaba dadka Soomaaliyeed waxa uu baasaysan jiray. Sidaa darteed Ismaaciil Mire gabaygiisa waxa ka muuqatay yididiila xumo iyo aayaha oo aan ka soo raynayn markii uu yidhi.

Adigaaba lagu gaadayaa gooshkan dabadeede.

Gaagaabso oo aamus yaan gaadh lagaa qabane.

## CASHARKA VII

### *GUUBAABO IYO GARNAQSI : SAYID MAXAMED*

Gabaygan waxa ayaamihii noloshiisa u dambeeyey tiriyey Sayid Maxamed, isaga oo dad Soomaaliyeed oo waxyeelladii ay dayaaradihii Ingiriiska ee Taleex duqeeyey gaadhsiiyeen aad ugu farxay, kuna digtay, ugu jawaabayey, kuna tusaalaynayey inaanu gumeystuhu iyaga qudhooda nabad gelin doonin. Sayidku waxa uu gabaygan dadka ku tusaaleeyey waxyaalaha uu gumeystuhu hadhow la soo bixi doono. Waxa uuna yidhi :

1. Anaa diidey gaal daacufle ah daba galkiisiiye
Anaa diidey degel inaan la galo daallin ii col ahe
Dalka ma lihid anigaa ku idhi dooraweynaha e
2. Dagaalkiisa anigaa u xishay daalib ku ahaaye
Durdurrada Firdawsaad anigaa doortay oo rabeye
Anaan labada daarood tan hore derejo moodeyne
3. Dahabkii uu wadey waanigii daadiyo qubay e
Gaalada direyska leh anaan diiradda u qabanne
Goortay dareeraan anaan duud xammaal noqone
4. Dujigeedba Soomaali baan deyrka ka ahaaye
Dhaxaan daraawiish ku idhi doonta gaalada e
Dhaaxay askaro uu dalbaday dabada taageene
5. Dhaaxaan dabkii iyo la hadhay duunyo uu wadeye
Dhaaxaan intaan Jananno diley soo dabaal degeye
Dhaxaan dekedo uu camiray dumiyey oo rogaye
6. Dunjigiinse waataad kufriga daba ordeyseene
Waataad igu dirayseen markaan diidey oo nacaye
Waataad iga digeyseen markaan duullaan bixiyaa'e
7. Waataad colaadii dorraad iigu daranteene
Markaan diirtay waataad duciyo dul igaga boobteene
Waataad markii aan dafaray daaba geliseene

8. Nin derderan ibleys baa dafoo daw ka raarida e
Dallacaad jacayl baad kurtiin noola dirirteene
Dubaaqana waxa idin ka galay daaro buuxsade e
9. Duul aan ogeen baan hayaa dooxa loo qodaye
Waa niman dufoobaan arkayn deyn in loo dhigaye
Waa wada damiin aan kasayn dabinka hoos yaalle
10. Doqonnimo darteed waa wixii iigu diirsadaye
Waa wixii dabbaaldegey markaan dawga sii maraye
Waa wixii durbaansanahayeen ii dub naxayne
11. Xadhka-heer u daadsane misana ciidda lagu duugey
Ee dooraweynow kufrigu dul uga saynsaabay
Markaan dunida dhaafan wallee lagu dahaayaa e
12. Igu diinta'aa iyo dafirid igula doodaanba'
Waxaad iga dambaysaanba waa dayrta maanta ahe
Maxaad igaga digataan berruu siin la soo degiye
13. Waa idin dagahayaa kufriga aad u debecdeene
dawo kama heshaan farenji aad daawo dhigataane
Dirhamkuu idiin qubahayaad dib u go'aysaane
14. Marka hore dabkuu idin ka dhigi dumar sidiisiiye
Marka xigana daabaqad ayuu idin dareensiine
Marka xiga dushuu idin ka rari sida dameeraaye
15. Dacwaddaas waxa loo qoray ninkii diinta nebi raacay
Waxana loo dan leeyahay ninkii dawladnimo haysta
Nin ragay dardaaran u tahee doqoni yeelkeeda

1. Daacufle : Buurya-qab ah, aan gudneyn
2. U xishay : doortay, rabey
labada daarood :if iyo aakhiro
3. Diiradda u qaban : dal yaqaan u noqon
duud xammaal : alaabta u qaadin, xammaal u noqon
4. Dunjigeed : dhammaanteed
deyr : gaashaan, ilaaliye
dabada taageene :baqa carareen
6. Duullaan bixiyo: col saaro

7. Markaan diirtay: markaan diley, ka adkaaday
   doc iyo dul: dhinac walba
8. Derder: walaan; dafa: qaatay, dhufsada
   daw ka raarida: meel ka tuura
   kurtiin: dhammaantiin
9. Dhufoobaan: waashay, wareeray, habaabay
   deyn: god, booraan
   damiin: wax ma garte
10. Diirsaday: farxay, rayreeyey
    dub naxayn: iga naxayn, ii naxariisan waayey
11. Xadhko u daadsan: loo dhigay, lagu dabayo
    duugey: aasey, qariyey
    dhabaaya: lagu aasayaa, lagu qarinayaa
12. Diinte': lagu xumaate, i xumayse
    dafrid: idiidde, cadowgii iga raacde
    Siin: taar
13. Debecdeen: raacdeen, u dhimriseen, isu jilciseen
    daawo: ballan saaxiibtinimo
    dirham: lacag
14. Daabaqad: cashuur

**Weydiimo :**

1. Waa-ayo cidda uu gabayga guud ahaan Sayidku kula hadlayaa?
2. Muxuu isagu gabayga qaybtiisa hore iskaga sheegay?
3. Muxuu uga jeedaa dahabka uu leeyahay waan daadiyey?
4. Waa maxay daarta hore ee uu sheegayaa? Waase noocee aftahamada ku jirtaa?
5. Maxaa ka mid ah waxyaalaha uu Sayidku dadka Soomaaliyeed kaga cabanayo? Kuwa ugu waaweyn iyo hoorisyada ay ku jiraan sheeg?
6. Tuduca 12aad si gaaban u sharax?
7. Tuduca 8aad muxuu kaga digayaa?

8. Tuducyada 13, 1yo 14, muxuu kaga digayaa? Sidee baadse u malaynaysaa, inay halgankii gobannimadoonka uga qayb qaateen?
9. Waa ayo cidda dawladnimada haysatey ee uu dooddan u soo jeediyey?
10. Maxaa looga jeedaa «nin ragey ———————— yeelkeede?

## CASHARKA VIII

*MA ANAA : Sheikh Ismaaciil Axmed (1880 - 1955)*

Gabaygan waxaa curiyey Sheikh Ismaaciil Axmed Barre, oo daraawiishtii Sayid Maxamed ka mid ahaan jirey. Sheikhu markii ay Daraawiishi jabtay ayaa uu reer-ihii ku soo noqday; hase yeeshee, waxa uu la kulmay canaan, eedeyn iyo aflagaaddo badan. Isaga oo ay noloshii bulshada dhexdeedu ku adkaatay, meel kale uu uga baxana waayey, buu markaas ku tashaday in uu dadka carrabkiisa iska jeediyo. Waxa uu yidhi :

1. Nimanyahow diihaal ima hayo'e waxan la diifoobey,
2. Ay cududahaygu u duubmeen umal dad weeyaane,
3. Waagii dillaacaba af xumo iga dul yeedheysa
4. Iyo hadallo deebaaq ah oo la igu daandaanshey
5. Darandoorigaas baan qabaa sida dabayleede
6. Dan la'aanta aadmiga kuwaa dacafka taagaaya
7. Duubleydu waxay geeysateey iigu dudayaane
8. War ma anaa wadaadkii ku diray dunida laynaayey
9. Waa tuu dariiqada Makiyo diin u haajiraye
10. Isagoo la diray, ma anigaa dib uga soo laabay
11. Dekeddii Berbera ma anigaa dalaq ka soo siiyey
12. Badduu soo dul maray ma anigaa doonnida u geeyey?
13. Daf daftuu la yimid ma anigaa dabajintii geestay?
14. Ma anuu dabeec iiga helay dab iyo maandhiinka?
15. Jiidali ma anaa deg idhi degelladuu saantay
16. Docmo iyo Nugaal ma anigaa Daaro ka ekeeyey?
17. Derbiyaduu rakibay ma anigaa dul iska saarsaaray
18. Ma anaa colkii soo duunnaa dawga maarinaayey
19. Ma anaa raggii dhulalkan yiil didiyey geelooda?
20. In aan diido in aan daaya adhi, inan diginiin geeyo,
21. Haddii aanan daaldaaladkaas daaqad ba u haynin
22. Daalaca la ii raacay waa mid iga diimoone

23. Hadduu dacwiyey uunku saw iguma daw waayin?
24. Soomaali waa daallin aan derejo eegeyne
25. Sidii xoolo doog helay hafrin igu daaqeene
26. Dembi ha iga qaadeen xan bay daanka dhigayaane
27. Kolla haddaanay deyneyn waxay kala dabeebeyso
28. Oo aanay deyn kama qabo'e dux iga qaadeynin
29. Waa neef dameer ah oo ka ciyey dugaagga reeraaye
30. Inkastay dannaaniga ridaan dan u bax saw ma aha?

*Sharaxa erayada :*

1. Diihaal: gaajo, darxumo; diif: diihaal, taagdarro
2. U duubmeen: u engegeen; umal: caro, ciil
3. Darandoorri: laba celis, laba gacmoodis
5. Dacafka: afka gafuurka (dadkaas aan dantooda qabsanayn ee faduusha iyo gardarrada afka la taagaya).
6. Duubleydu: daraawiishtu
7. Sayid Maxamed waa kii Maka u diin doontay ee ma anigaa isaga oo Jahaad loo soo diray dib u soo ceshey. Oo intaan doonni soo saaray Berbera ka soo dejiyey?
13. Dabajintii: dagaal abaabulkii, weeraradii
14. Jidaal: meel Ceerigaabo u dhaw oo uu Sayidku degey saantay: doortay giis
16. Docmo: meel hawdka ah, oo Sayidku degey ka ekeeyey: ka simay
17. Rakibay: dhisay: didibka: dhagax Nugaal laga helo
18. Soo dunna: isa soo urursaday, soo duuley
19. Ma anaa dadkiinii dhulkan degganaa geeloodii qaaday
20. Ii ma suura galeen inan wax idinka celiyo ama idiin digo
21. Mar haddii aydaan Daraawiish ka mid ahayn
22. Waa maxay haddaba eedda aad i saaraysaan aniga ma garanayo e (iga diimoow: iga qarsoon)

23. Mar haddii aan dooddaydii sheegtay, saw haddaba la iguma gar waayin ?
27. Kolla haddii aanu dadku Xanta iyo beenta la isla xulayo iska dhaafayn, asaanay waxba iga qaadeyn, illaa anigu waxba uma geesanne. Waxay doonaan ha iskaga hadleen, hadalkoodu waa sida cida dameeraha e.

**Weydiimo :**

1. Maxaad gabaygan kala soo dhex baxaysaa, markaad hadalka Sheekha aad u dhuuxdo?

I. Sayidku miyuu daynayaa, mise wuu ammaanayaa ? Waayo ?
II. Dadka miyuu u garaabayaa, mise wuu eedaynayaa?
III. Dooddiisa ma ku gar siinaysaa mise waad gar waaqsiinaysaa, waayo ?

## CASHARKA IX

### *SHEIKH BASHIIR: XAAJI AADAN AFQALOOC*

Gabaygan waxaa tiriyey Xaaji Aadan Axmed Afqalooc sannadku markii uu ahaa kun iyo sagaal boqol iyo afartan iyo toddabadii (1947), isaga oo dadka Soomaaliyeed wax u sheegayey isla markaasna, canaan iyo gubaabiba u dhammaynayey, ayaa uu Shiikh Bashiir iyo geesiyaashii la mid ahaa ugu soo hal qabsadey, Xaajiga waa lagu xidhay gabaygaas. Gabaygan waa dheer yahay, waana la soo gaabiyey. Xaaji Aadan waxa uu yidhi:

1. Duhur baa Bashiir lagu shannaqay daar agtiin na ah e,
2. Dahriga iyo laabtay rasaas kaga daloosheene,
3. Isaga oo «dem» iyo dhiig leh oo maro ku duuduuban,
4. Dadkii uu necbaa iyo kufri baa daawasho u yimide,
5. Meydkii oo Daahir ah markii debedda loo tuuray,
6. Ee aaska loo diidey waad wada duljoogteene
7. Dar kaloo ciyaar lagu diliyo dawgal baa jirey e
8. Oo aanay deer deero u herdiyin dudub galkoodiiye
9. Ma duugoobin Qaybdiid lafuhu waana duxayaane
10. Da'dii uu ahaa Faarax baa jeelka loo diraye
11. Iminkuu siduu dawri yahay dibedda meeraaye
12. Loo diid dadkii uu dhaliyo duunyaduu dhaqaye
13. Dad oo idili soo eri ninkii daallinka ahaaye,
14. Ingiriis wuxuu dooni jirey reer hindiya diidye,
15. Sidii gaani doonayey baa haatan daalac ahe,
16. Daarihii banjaab iyo ka kace dahabkii hoos yiile,
17. daymada haddeereey indhuhu dib u jalleecaane,
18. Damaashaadku waa Maxamed Cali loo dabbaaldegey e

19. Waa duubey faransiis dhulkii Suuriyuu degey e
20. Dekedii Lubnaan iyo ka keceye degelkii Beyruude
21. Dekedaha maraakiib shixnadan baa ka soo degiye
22. Dadxoorta oo idil halkanaa lala damcaayaaye,
23. Halka daawad xaradeedu tahay gaaladaa degiye
24. Nin dayuurad iyo gaadhi laa beer idiin dirane
25. Durgufkiinna soo hadhay waxaan doonayuu arage

*Sharaxa erayada :*

1. Shannaqay: gawracay, dilay
2. Dahriga: dhabarka, adhaxda
3. «Dem» : dhiig
7. Dawgal: gardarro
8. Deero deero u herdiyin: cidi isweydiin dudubgalkoodii: geeridoodii, iilkoodii
9. qaybdiid: Sayid Maxamed, duxayaan: cusub yihiin
10. Faarax Oomaar:
11. Dawri: libaax, debedjoog
13. Ninkii daalinka ahaa: Ingiriis
18. Maxamed Cali Jinaax: Madaxweynihii Bakistaan
21. Dekedaha Soomaaliya:
22. Daadxoorta: gaalada la soo erey oo dhan
25. Durgufkiina: wixii idinka soo hadha, baaqiga

*Sharaxa guud :*

Xaajigu isaga oo Soomaalida ku guubaabinayey, sida dadyowgii kale gobannimadoodii u taabeen, iyo khiyaannada Ingiriisku ku wadeyna u sheegayey, buu geesiyaashii Soomaaliyeed ku soo halqabsaday oo yidhi

Duhur dharaareed oo cad baa Shiikh Bashiir dhexdiinna lagu dilay, oo rasaas meel walba loogaga daloos-hey. Markaas baa isaga oo dhiigii ku yaal loo soo daawasho tegey oo cadowgiisii ku tiiqtiiqsaday. Markii daawashadiisii laga dhergey, baa meydkiisii debedda la dhigay oo in la aaso loo diidey, idinkuna waad daaw-

aneysey kamana aydaan dhiidhiyin. Geesiyaal badan oo kale ayaa iyagana gardarro iyo cayaar lagu diley; oo aanay cidna u aarin, waxaana ka mid ah Sayid Maxamed iyo Faarax Oomaar. Soomaali uun baa dedane, ummadihii kale oo dhami indhihii bay kala qaadeen, oo gumeysigii bay iska saareen. Reer Hindiya waa ay xoroobeen oo Ingiriis waa ay iska eryeen, isaguna hadduu sidii bahal xoolo laga dhex saaray meel dib uga soo eegayaa. Faransiis laga eri Suuriya iyo Lubnaan. Ciidammadii gumeysiga ee la soo eryey oo dhammi Soomaaliya ayey ku soo socdaan. Waxa ayna degayaan meesha geelu inoo daaqo. Waxaad u shaqayn doontaa gaal baabuuro iyo dayuurad leh oo idin addoonsada si aad beerihiisa uga shaqaysan. Markaas bay inta idinka soo hadhaa, waxa aan uu dhawaaqayo ila garan doontaan.

**Weydiimo :**

1. Muxuu Xaajigu uga jeedaa, dadka uu necbaa? Waa ayo dadka uu sheegayaa ee geelka mooyaane Shiikh Bashiir necbaa?
2. Muxuu dadka ku canaanayaa, markaa uu leeyahay, «Ee aaska lôo diiday waad wada dul joogteene.
3. Sharax tuduca 9aad, adiga oo muujinaya ujeeddada suugaaneyd ee ku jirta.
4. Tuducyada 10, 11, 12, waxay ka hadlayaan Faarax Oomaar. Faallo gaaban ka qor waxa soo qabsaday sida gabaygan ka muuqata.
5. Muxuu Xaajigu dalka tuducyada 14 — 20, ku xusan dadka Soomaaliyeed ku tusayaa? Muxuuse kuwaas u soo qaatay?
6. Waa-ayo ninka tuduca 15aad ku xusani?
7. Waa kuwee dekedaha Xaajigu sheegayo ee ay maraakiibtu ka soo degeysa?
8. Xaggee dadka ay maraakiibtaasu sidoo lagu wadey, **sida Xaajigu sheegay?**

## CASHARKA X

### *HAMMI: SHIIKH ISMAACIIL*

Qof kasta oo nool oo miyir qabaa, waxyaalo uu xagga nolosha ka qiimeeyo ayuu maskaxda ku hayaa intaana ka fikirayaa, hawl iyo dedaalna ugu jiraa sidii gaadhistooda uu u suurtogelin lahaa inta uu nool yahay. Sheekh Ismaaciil oo muddo ilaa boqol sannadood laga joogo gabaygan curiyeyna sidaas oo kale ayuu ugu hammiyayey waxyaabo uu is lahaa aad soo taabatid. Sida gabayga ka muuqatana waxa uu rumaysan yahay in uu hayo waddadii uu arrimahaas ku suurtogelin lahaa. Waxa uu yiri:-

Xalay waxa isniintii i helay toban ummuuroode
Asal gama'na ways idhi haddana uurka kama seexan
Indhahana ma kala qaadihayn aragna way muuqdey
Afka kama dhawaaqeyn haddana aamus ma aan yeelan
Ogaan uma qosleyn oo haddana iligyadey muuqdey
Aradkana dad kuma weheshaneyn ururna waan joogey
Albaabada dushaasaan ka jirey aqalna waan jiifey
Istanbuuli cadar layma marin udugna way daaray
Oon baa i dilay oo biyaan ku ag wareegaayey
Onkod iyo hillaac roobna waa nagu itaaleeyey.

Ufo dhibicdu may wadin haddana ooduhu lulayey
Awaarii ma nabin oo haddana wuu anfacay kaynta

Anfariir xaluun baan hurdada oog la soo kacaye
Illinkaan tallaabada ku wadey waan abbaarahaye
Meeshaan abraarada ku tago aakhir bal aan dhwro.

**Weydiimo :**

1. Qodob qodob u qor ammuuraha Sheekh Ismaaciil uu ku hammiyayey?
2. «Asal gama'ana ways idhi haddana uurka kama seexan».
   Muxuu tuducani kuu muujinayaa ......... ?
3. Tuducyada ujeeddadooda guud sharax :
   «Aradakana dad kuma weheshanayn ururna waan joogey»
   «Oon baa i diley oo biyaha ku agwareegaayey»
   «Albaabada dushaasna ka jirey aqalna waan jiifey»
   «Onkod iyo hillaac roobna waa nagu itaaleeyey»
   «Iilinkaan tallaabada ku wadey waan abbaarahaye».
4. Gabayaagu waxyaalaha uu ka gabyayey fikrad-daada ka bixi ................................ ?
5. Waxyaalaha aad maskaxda ku hayso kuna dedaal-ayso inaad gaadho faallo ka bixi adoo sidii aad ku gaadhi lahayd inaad waddadeedii hayso iyo in kale muujinaya ................................ ?
6. Qofka intuu nool yahay nolosha dunida isku dhafmo ma kala helaa? Ka hadal ?.......... ?
7. Saboolka iyo maalqabeenka midkee hammi iyo qammi yar? Ka hadal .......... ?

## CASHARKA XI

### *AMMAAN FARAS: CALI BUCUL*

Geeraarkan waxa faraskiisa ku ammaanay nin Cali Bucul la odhan jirey oo qarnigii sagaal iyo tobnaad badhtimihiisii noolaa. Cali Bucul waxa uu ku dhashay degmada Boorame. Waxaanu dhalay Suldaan Cumar Cali Bucul oo ahaa ninkii Amxaarada is-hortaagay markii ay canshuurta qaabka daran ku soo rogtay dadkii Soomaaliyeed ee dhulkaas ay xabashidu haysato deggana[illegible] sannadkii 1934kii. Cali waxa uu isaga oo faras uu lahaa [illegible]nmaanayey yidhi :

1. Gammaan waa magac guud oo
   Sengeaan gabbanayn oo
   Heerin[illegible]di ka giigtiyo
   maga[illegible] gudanaayee
   Waa[illegible] uu ku gargaartiyo
   Geen[illegible] dhaddigeydii
   Giddi[illegible] ka dhexaysey
   Hay[illegible]ysku gartaanee
   Habko[illegible] kala gaar iyo
   kala [illegible]oon ka yeelayoo
   Mida[illegible]rka u goostaa
   Geed[illegible]oga qiraaye
   Gob[illegible] ma aha oo ?
2. Guul[illegible] faraskayga
   Hadd[illegible] gallaaddiisiyo
   Gedi[illegible]ilmaamo
   Waa [illegible]aaxanaya oo
   Gaad[illegible]yno xogtiisa oo
   Waan ka gaabsanayaaye
   Rag allow gef miyaa ?

3. Almis gooddiyadeediyo
Galihii harawaadiyo
Gureys beelaha yaalla
Galab buu isku maraaye
Ma daruur gudgudaa ?

4. Gabangoobi abaar ah oo
Dadku guunyo ka quustay
Geel buu soo tu'iyaayee
Ma gob reera dhacdaa?

5. Galuhu miranaayo

6. Gurxan dhawrta fogeeyiyo
Gooh weyn baa ka galoosee
Ma aar goosan wataa ?

7. Galuhu ku xidhnaana
nacab soo gardarraystiyo
Gaas laxaadliyo guuto
Guluf weerar ku qaadiyo
Gaade goonya wareegiyo
Guhaad wuu ka xijaabay oo
Rugtiisa gaajo ma geydo
Saanaa loo gama'yaa
weelka uunka gumaadee
Laga giigay miyaa ?

8. Gudcur roob gibil saara'oo
Gufaacadiisiyo caydhku
Naflaydii gilgileena oo
Guuxu maanka gantoobay
Tuuga soo gabbanaayuu
Dabayshiisa gartaayee
Ma kuhaan garab daar leh oo
Faalka guun ku noqdaa?

9. Korkiisoo aan gaboobin
Halgaraadka guntiisiyo
Guudkii buu ka caddaadaye
Ma galool ubax laa ?

*Sharaxa erayada :*

1. Heerimaad: gaabsi; dhaliil; giigtay: duddey, mag-aan: liite, faras xun.
2. Galladdiisa: wanaaggiisa; gal: balli, ceel, xogtiisa: ammaantiisa: tilmaantiisa.
3. Almis: buur xeebta Bulaxaar iyo Seylac u dhexaysa ku taal; Haraw: Tog ama dooxo, degmada Boorame ku taal; Gureys: buur Jigjiga u dhaw. Gudgude: roob habeenkii da'a.
4. Gabangoobi: gegi aan geedo iyo biyo midna lahayn tu'yaa: keena, fadhiisiyaa.
5. Gurxan: hugun; dhawrta: bahalaha; galoosa: baxa aar; libaax; nacab: cawod; laxaad: xoog.
6. Guluf: col; gaade: col-guluf; geydo: timaaddo saana: dhab; gummada: laaya; giigay: baqay.
7. gudcur: mugdi; caydh: weedh-roob dabayl leh, gaartoobey: baqe geliyey, cidhiidhi geliyey. Kuhaan: faaliye; garabdaar: wax ogaad:
8. halgaradka-tun wareerka: tuurta. Galool: geed, maydhax leh.

*Sharaxa guud :*

Farduhu magac guud waa iskaga fardo, hase ahaatee, waxay ku kala tagaan, orodka quruxda, iyo hawleenka. Arrimahaas baana mid waliba qiimo iyo qaayo u gaar ah u yeela.

Faraskayga guulside, ammaantiisa lama dhammayn karo, maxaa yeelay, wanaaggiisa waa sida ceel biyo badan oo marba soo maaxanaya. Wanaaggiisa waxa ka mid ah, dheerayn ama orod badnaa. Galab keli buu sida roobka, Almis, Bullaxaar, Harawo, iyo Jigjiga isaga dabaqaadaa.

Haddii ay abaari dhacdo oo la caydhoobo, geel buu xerada ku soo shubaa. Guriga uu joogo gurxan iyo gooh baa ka baxa oo cidi kuma soo dhacdo, ee sida wedkaa looga cabsada ! inkasta oo ay gudcur dam ah tahay, meel fog buu wax ka arkaa. Oo tuug kasta oo soo dhuumanayaa, waxba meesha uu joogo kama xadi karo. Isaga oo weli da' yar buu haddana giirka iyo guudkaba cadcaddaan ku yeeshay, ee qurux badnaa ma galool ubax bixiyey baa ?

**Weydiimo :**

1. Muxuu gabayaagu uga jeedaa tilmaamaha soo socda:
   ma gob reero dhacdaa? Laga giigay miyaa? Waay-eelku uu ku gargaarto - rag allow gef miyaa ?
2. Intee qaybood buu abwaanku fardaha u kala qaa day?
3. Tuducee baa ku tusaya inuu faraska Cali aad u indho fiiqnaa ?
4. Tuduca soo socda, Cali baa isagana faraskiisa ku ammaanay, ee sharax gaaban ka bixi, adiga oo garab dhigaya, tuduca u dhigma ama ku dhaw ee geeraarkan ku jira :
   «Hilmiyey oo hilmiyey,
   Oo ammaantii heli waayey
   Hoosiisow midabkaagu
   Ma habeenkiyo waagoo
   Kala haayirayaa ?»
5. Sayid Maxamed wuxuu isaga oo faraskiisii Xiin Finiin ammaanayey yidhi :
   «Xawaariyo kadliyo gaalib, iyo xawllis iyo jeefag,
   Xaggii loo dayoba waa gammaan xulashadiisiiye,
   Tuducyada Cali Bucul ee kuwa Sayidka u dhigma soo saar, dabadeedna is-garab dhig.

## CASHARKA XII

*LAYGU KAA DHERER: (Maxamed Nuur Fadal)*

Gabyaagan waxaa tiriyey Maxamed Nuur Fadal oo degmada Burco ku dhashay qarnigii sagaal iyo tobnaad dabayaaqadiisii, kaddibna dalka Kiinya degey, halkaas oo uu ku xijaabtay afartanaadkii (1940).

Maxamed gabayga waxa uu ku halqabsaday nin saaxiibkii ahaa oo Xasan la odhan jirey, markaasna haasaase guur hiyiga ku hayey. Waxa uuna isaga oo tilmaamayey uu yidhi:

> Xasanow dhawaaq gabay haddaad iga dhaguugeyso
> Hadduu guur qalbiga kaaga dhaco dheellin baad tahaye
> Dhadhan ma laha naagaha middii dhoocil noqotaaye
> Dhulka jiifta lama guursadiyo dhererka qaarkiise
> Hadday dhuubo-weyd tahayna waa raaxo kaa dhimmane
> Meeshiyo dhallaanimo yartaan anigu dhawraayey
> Dhildhilada gacmaha iyo shanshada dhumucda loo yeelay
> Dhexda madag ah, dhaayaha indhaha dhaban wanaaggeeda
> Dhudda qoorta iyo faayahay Dhudi la soo jeedo
> Dhubbad qaadka timahaad haldhaa dhalanki moodeysey
> Cirrid dhuxula iyo suuniyaha dhibic dawadeed ah
> Dhumbal wada cad dhoollaha ilkuhu dhaygag noo dile'

Saddex dhudley dhacliyo dawli dhexir wanaaggeeda
Maqfiyada gacmaha lagu dhuftaye saaqa lagu dheehay
Dhamideedba maantay direys dheeg iskaga yeesho
Ee ay dhabeelnimiyo qurux dhuuxa ka iftiinto
Dhugta kabaha iyo laafyaha(dhebel) u sii deyso
Kolkay socodka dhiif uma digto'e, dhebi sidii liicdo
Dhugoy ina rag kay dhinac martaa, dheellimaad galab ah
Dhaqan iyo adduun lama hadheen dhogorta xoolaad e
Inta dahabku lacag dheer yahay dumarka dhaantaaye
Dhuuxayga iyo feedhahay dhudi ku laaqnayde
Sidii igadh maqaar loo dhigay ii dul dhererrayde
Inkastay dhallaan yeelatiyo ubad dhawaaqaaya
Dhimashadu ha joogtee si kale waw dhur sugayaaye
Dhufsataye qalbiga ma anigaa dhudi ka reebaaye

**Sharaxa Guud :**

Gabyaagu isaga oo saaxiibkii Xasan oo markaas guur u ambabaxaayey ku halqabsaday buu yidhi:

Jaalle Xasanow, haddaad murti gabay iga jirineysey, saakaan kugu jalbeebinayaaye, jalowgeyga dhegeyso. Waa adiga boqoolaaye, haddii haabkaaga galay, dhooc-isha gaaban ee gu'geeduna weynaadey, markeeda horena aan gaarinnimo iyo firfircoonaan u dhalan lama **guursado ee ka dheerow.**

Dhererka xad dhaafka iyo gaabida xubinta ah midna xilo lagama dhigto ee iyagana iska dhaaf. Haddii ay dhuuban tahay oo aanay hilib u dhalan, dhadhan raaxo ma laha ee iyadana ha u dhawaan.

Gabayaagu isaga gabadha uu isagu qoodaystay tilmaamay, saaxiibkiisna rabay in uu ku qiyaas qaato, ayaa uu yidhi:

Anigu taan qoodaystay tan iyo sebinimadaydiina sahankeeda ahaa, aan sifadeed ku siiyo ee si fiican u dhegeyso. Taydu waa mid dhammaystiran oo aan far dhiman loo yeelin, cududaha buuxa, dhexda qabatin ka ah, qoorta dheer ee shuban, timaha midabka haldhaaga leh, iyo ilkaha dhayda ka cad, waxaad u dhigto dhulkaba looma soo saarin. Marka ay dhab u lebisato ee maro saddex dhudood ah, boqor iyo dhacle dhag isku siiso, nin dheehdaa in uu ka daba dhaqaaqo mooyaane dhan ugama jeesto; dhammaan waxa uu maal dhaqdayna wuu ka dhiibi lahaa.

Dhudi inta uu dahabku lacagta ganac ku dheer yahay bay haweenka qiime iyo qurux dheer tahay, anigana dhammaantay, dhuux iyo lafoba waa ay igu dhan tahay. Sidii igadh markii loo dhigay maqaar bay markay, i aragtaba i miliilicdaa. Inkasta oo ay dhaxdin noqoto, ama ubad badan dhasho, waa aan ka dhursugayaa, maxaa yeelay, qalbigay dhufsatay oo cid ka reebi kartaa ma jirto.

**SHARAXA ERAYADA:**

1. Dhaguugeyso: sugeyso, jerineyso
2. Dheellin: socod, ambabax
3. Dhoocil: da'weyn oo aan qurux lahayn
4. Dhul jiif: gaaban
5. Shanshada: kubka
6. Faayaha: quruxda

7. Dawaad: khad
8. Dhubadqaad: dabnoonka timaha
9. Dhabeel: gaari, fariid
10. Saddex dhudood: saddex qeyd
11. Saaq: dahabka
12. Waqfiyada: qalabka gabadhu gacmaha ku xidhtaan
13. Dheeg: qurux
14. Dheellimaad: galab carraabo
15. Dhererreyd: taagneyd

**Weydiimo :**

1. Muxuu gabyaagu ku dhaliilay naagta gaaban guurkeeda?
2. Maxaa nin Dhudi arka ku kallfi lahaa inuu maalkiisa bixiyo?
3. Tuducee buu ku sheegay inay gabadhu aad u jeclayd?
4. Guud ahaan faallo kooban ka bixi gabaygan?

# CASHARKA XIII

*HOOYO: (Hadraawi)*

Heestan oo tilmaamaysa qiimaha Hooyada iyo halka ay kaga jirto mujtamaca, waxa tiriyey abwaanka caanka ah Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi). Wuxuu abwaanku ku tafaftirayaa xilkasnimada hooyadu leed-ahay, kuna barbaarinayso ubadka.

Hooyooy la'aantaa adduunyadu hubaashii
Habeen kama baxdeenoo iftiin lama heleenoo
Dadku uma hayaameen dayax heega joogoo
Sida haad ma fuuleen xiddig hawada lulatoo
Hawo laguma gaadheen hubka laguma tuureen
Cirka hirarka muuqdoo ruuxaad hagaysiyo
Usha nimaad u haysaa hilin toosan weligii
Ka habaabi maayee hooyooy addoomuhu
Halkay maanta joogaan adigow horseedee
Intaad hanad xanbaartee haaneedka siisee
Horaaddada jaqsiisee habtay baan xisaabiyo
Tiro lagu heleynoo marka aad nin hanadoo
Laga baqo hashiisiyo halyey diirran dhashaaba

Hooyo lagu xasuustaa

Marka aad nin hoo loo marti hagar ka gelinoo
Gurigiisa habaqluhu isku soo halleeyoo
Hayntiisa quudhoo hor Ilaahay geystiyo
Lama hure dhashaabaa

Hooyo lagu xasuustaa

Marka aad nin himilada hilin toosan mariyoo
Sii deyn hogaankoo howlaha qorsheeyoo
Hir markii la gaadhaba ku labaad hilaadshoo
Haga maatidiisoo la higsado dhashaabaa

Hooyo lagu xasuustaa

Marka aad nin hoogiyo ka hortaga dagaalkoo
Dabka hura bakhtiiyoo garta hubin yaqaannoo
Xaqa hoos u eegoo halistiyo colaadaha
Ku hagoogta dhiiggoo dadka kala hagaajoo
Kala haga dhashaabaa

Hooyo lagu xasuustaa

Markaad hoobal caanoo sacabka iyo heellada
Labada hannaanshiyo hindisaa farshaxanoo
Habdhaca iyo luuqdaba rabi hibo u siiyoo
Hawraarta maansada heensayn yaqaaniyo
Hal abuur dhashaabaa

Hooyo lagu xasuustaa

Dumar iyo haweenbaa guur lagu haweystaa
Kuwa lagu hammiyayee sida hawd caleen weyn
Rag u wada hamuumee ishu halacsanaysaa
Hablahaaga weeyoo marka guur la haybshee
Gabadh heego dheeroo hoobaan la moodoo
Karti iyo hubqaad loo quruxdana ka hodanoo
Hufan laga aroosaa

Hooyo lagu xasuustaa

Hooyooy la'aantaa higaad lama barteenoo
Hadal lama kareenoo ruuxaanad habinoo
Kolba aanad heesiyo hoobey ku sabinoo
Howshaada waayaa hanaqaadi maayee
Hooyooy taftaada dugsi laga helaayoo
Hooyooy dhabtaadaa hurdo lagu gama'ayoo
Hooyooy dushaadaa nabad lagu helaayoo
Waxa lagu hal maalaa hooyo ababintaadee
Hayin lagu badhaadhaay hogol lagu qaboobaay
Gogol lama huraaney dugsi lagu hirtaayey

Hiddo lagu arooraay

Intaad hooyo nooshahay hanbalyiyo salaan baan
Hanti kaaga dhigayaa habrashiyo xaq dhawr baan
Dusha kaa huwinayaa
Hooyoy dhimashadaaduna hoogeyga weeyee
Weligay hogaagaan ka dul heesayaaye
Hiyiga iyo laabtaan kugu haynayaayoo
Hangal baan u xidhayaa inta haadda duushiyo
Idil habar dugaagoo ifka hibo ku noolow

Aakhiro halkii roon

**Layli:**

1. Si fiican u sharax tuducyada ka bilaabma (Hooyooy la'aantaa ........ Hubka laguma tuureen).
2. Sidee bay ugu qalantaa ammaantaa iyo sifooyinkaa abwaanku ka bixiyey hooyo ........ ?
3. Ka soo dhex saar heesta saddex tuduc oo tilmaamaya ninka deeqsiga ah?
4. Waxaad soo saartaa laba beyd oo ka hadlaaya nin hoggaan wanaagsan?
5. (Hooyooy taftaadaa dugsi laga helaayoo
Hooyooy dhabtaadaa hurdo lagu gama'ayoo
Hooyooy dushaadaa nabad lagu helaayoo)
6. Aabbuhu miyaanu ammaantaas oo kale u qalmin?

## CASHARKA XIV

### *NEBI AMMAAN*

Soomaalidu waxa ay tidhaahdaa, (Nebi Allow, Nuur Allow, Ninba Afkii kugu Ammaan). Heestani waxa ay ka mid tahay heesaha Nebi ammaanka ah ee aad loo jecel yahay, laguna qaado ayaamaha Diinta Islaamka iyo dadka Islaamka ah ku derajo sarreeyaa. Heestu waxa ay muujineysaa garashada, xilkasnimada iyo asluubta Nebigeennii Suubbanaa, Ilaahay korkiisa nabadgelyo ha ka yeelee.

Dayaxii reer Maka u horseedey diintow
Dadkii adduunka daa'inkii ku nuurow
Sayidkii la doortee dadka ugu mudnaayow
Dadka laysu soo diro kii ugu dambeeyow
Xaqa kaan dadeyn dadna aan dulmeynow
Duca qabe Rasuulkii daa'in uu jeclaayow
Dayaxii reer Maka u horseedey diintow
Dadka adduunka daa'inkii ku nuurow
Kii diin Islaamka u dagaallamaayow
Mushrikiinta diiddiyo gaal kii dilaayow
Waxyigii la soo direy kaan naga dayacinow
Dayaxii reer Maka u horseeday diintow
Dadkii adduunka daa'inkii ku nuurow
Dibnihiisa beenta nebigii u diidow
Denbi aan lahayn xuma laga daahiriyow
Daarihii fardoosaad kii loogu deeqow
Buraaqdii la soo direy habeen kuu la duulow
Dayaxii reer Maka u horseedey diintow
Dadkii adduunka daa'inkii ku nuurow
Dulqaad badanihii aan weligii dudeynow
Dibnihiisa benta Nebigii u diidow
Dacar hadday ka adag tahay runta kii ku doodow.

**Layli :**

1. Ma taqaan heeso kale oo Nebi ammaan ah?
2. Tuducyada heesta aad u dhadhanso oo u qiyaas qasaaidka carabiga ah.
3. Sayid Maxamed wuxuu yidhi:
   (Qorraxdoo duhur joogtuu qariyoo ka caddaaye,
   Quruxdii Nebigeenna yaa qiyaasi karaaya?)
   Is garab dhig, tuducyada Sayidka iyo kuwa u dhigma
   ee heesta ku jira, midkoodee baa kula xeel dheer?

## CASHARKA XV

Suugaanta Soomaalidu waxa ay had iyo jeer la qoob wadaagi jirtey heerarka nolosha, dhaqanka, xilliga, iyo hadba wixii kale ee ummadda guud ahaan ama qayb ka mid ah, gaar ahaan ula soo gudboonaada. Wanaagga, xumaanta, nabadda, colaadda, jacaylka, dardaaranka, waanada iyo kaftankaba waxa aynu arkaynaa inay Soomaalidu ka gabyi jirtey. Ammaanta geela, gammaanka iyo gabdhuhu waxa ay ahaan jirtay qodobbada suugaantu ugu badnaan jirtey.

Shisheeyuhu markii uu dalka Soomaaliyeed gacanta ku dhigay, ayaa uu hadba qodob cusub oo aad qiime weyn u lihi suugaantii ku soo kordhay. Qodobkaas oo ahaa siyaasadda ama waddaniyadda. Raggii qodobkaas isaga ah bilaabay, waxa calanka u sida Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, oo kumanyaal tixood ka tiriyey. Sayidkii dadka Soomaaliyeed waxa uu uga tegey, gabay dardaaran ahaa, oo ilaa hadda lagu daydo, iyada oo ilaa iyo maalintii Sayidku xijaabtey si dhab ah loo ogaaday, in gumeystaha lala doodi karo, loo qabyi karo, marka ay ka fursan weydana lala dagaallami karo.

Waxa ay ahayd dagaalkii labaad ee adduun weynaha dhexdiisii markii ay rag dhawr nin ah oo Soomaaliyeed, gumeysiaga runta u dhiibeen. Raggaas oo ay ka mid ahaayeen Cabdi Gahayr iyo nin ina Nuur Laangadhe la odhan jirey oo ilaa iyo hadda nool. Cabdi Gahayr waxa uu isaga iyo afadiisii oo siyaakhad weydisatey la hadlaya sannadkii 1940kii yidhi :-

1. Ina Cumar Qadhoone adduun qalle bixi waaye
2. Qasnadaha raggii keydsan jirey qaar baa tuugsadee
3. Ingiriisba laga qaad dhulkuu qaybta ku lahaaye
4. Qarka wuxuu la meer meerayaa waa nin soo qaxaye
5. Dayuuraduhu waa qayla doon qoorta marayaa e'

6. Qorigii «Suweys» maylashii kama qamaadaane
7. Adigaaba qalab doonay quusey Faransiise.

Gabaygan oo uu Cabdi Gahayr inuu afadiisa waxyaalaha adduunka ka dhacayey ugaga warramo ula qabsaday, wuxuu run ahaantii noqday gantaal gumeystayaasha laabta ka abaaray. Dadka Soomaaliyeed oo Ingiriiska iyo Faransiiska xoogag waaweyn oo aan af iyo gacan toona lagaga guuleysan karin u haystey baa markiiba gabaygaasu isgaadhsiiyey oo wada qaybay. Gabaygaasu siduu Ingiriiska u taabtay waxaa ina tusaysa daawashadii Ingiriisku Cabdi Gahayr Masar ku geeyey si uu inay kinaalkii Suweys haystaan u soo tuso.

*Eray cusub :*

1. Qoobwadaag: la socod
2. Xujaabtey: dhintey
3. Siyaakhad: qalabka dumarku xidho
4. Qaalle bixwaa: dhibaato beeli waa
5. Qarka: dibadda
6. Maylaashii: maraakiibtii
7. Abaartay: ku dhacday.

Tuduca macnihiisa waa: Kinaalkii Suweys maraakiib Ingiriis leeyahay ma marto.

Qaybtii labaad ee casharka: Maxaa iiga gidhiisha ah ?

Geeraarka soo socda waxaa sannadkii 1943kii curiyey nin gabayaa ahaa oo Maxamed Nuur Laangadhe la odhan jirey. Maxamed Nuur waxaa la weydiistey inuu «Raadiyaha Hargeysa,» gabay uu libihii dagaalkii ku ammaanayo ka tiriyo. Isla markaasna uu Jarmalka iyo saaxiibadii ku ceebeeyo. Maxamed taas wuu diidey, wuxuuna isaga oo gesinnimo hadlayey, runna sheegayey, yidhi :-

1. Mar haddaan gurigayga
Gidhli gaanka gariiriyo
Garnayl loo lala tegeynin
Iglan baa gubaneysee
Maxaa iiga gidhiisha
Gudaha ceelka Hargeysa
Weligey gees uma dhaafine
Bal maaxaan laba gaal
Oo abtirsiina gudboon
Midkood aan gumeen
Midna guusha u siinoo
Aniga ii ga gidhiisa ah
gudahe ceelka Hargeysa
Weligey gees uma dhaafin
Inta aan waxa gasiintiyo
Intaan gaajo ku seexday
Haddii aan isu geeyo
malaha waa isku gaw e
Mar haddaan ka gabayey oon
Go'aygiina ka qaatay
Maxaa iiga gidhiisha

*Erayga cusub :*

1. Gidhi gaan: buntuqa weyn, hub culus
2. Garneyl: nooc kale oo hubka ka mid ah (hand garanade)
3. Maxaa iiga gidhiisha: maxaa iga galay? Maxaa iiga jira?
4. Gasiintey: cunay, quutey
5. Iska gaw: isla eg yihiin

**Weydiimo :**

Maxay ahayd munaasabaddiiuu Cabdi gahayr ka gabyayey ?

2. Muxuu Ingiriiska iyo faransiiska meesha u keenay?
3. Sidee bay labada gabay ee kor ku xusani dadka Soomaaliyeed u saameeyeen? Sidee bayse gumeystaha u raadeeyeen?
4. Muxuu gumeystuhu labada gabayaa ku ciqaabay, ama hog tusay?
5. Dhinaca gumeystaha mooyaane, labada gabay gees kale wax ma ka wadaagaan? Sheeg?

## CASHARKA XVI

### *MAAHMAAHDA IYO MURTIDA*

Casharradii fasalka koowaad waxa aad ku soo qaadatay, deris maahmaaho iyo murtiyo ka kooban, waxa aadna soo aragtay kaalinta weyn ee ay maahmaahdu dhismaha afka iyo dhaqanka Soomaalida kaga jiraan. Halkaana waxa aad kula kulmaysaa qayb kale oo isla mawduucaas ah.

### *QAYBTA MAAHMAAHAHA*

1. Meel hoo dooneysa hadal waxba kama taro

Waxaa loogu maahmaahaa, marka ay arrini u taagan tahay, adduun ama xoolo la dhiibo, deyn la isku leeyahay ha noqdeen ama deeq la isweydiisanayo e, ee uu qofkii ama ciddii wax lag doonayey in ay hadal wax u doodsido ama dib ugu dhigo damacdo.

Maahmaahdu waxa ay baxday, markii nin deyn loogu gola fadhiyey maantana far baa maydh la' iyo halkan bay ka fakatay in uu arrinta ku fududeeyo damcay. Gudidii arrinta ku dhex jirtey nin ka mid ahaa baa markaas hadalkii qaatay oo yidhi: «meel hoo dooneysa hadal waxba kama taro ee waxa lagaaga fadhiyo keen».

2. Mar i dage alla ha dago, laba jeer i dagese, aniga ayaa is dagay.

Waxaa loo cuskadaa, qofka mar hadal ama hagardaamo hore kuula yimaado.

Ninka maahmaadan bixiyey, waxa uga jeedey in ay suura gal tahay in uu qof mar isu kaa waanaajo, oo ku dago, hase yeeshee, haddii mar labaad riwaayaddii hore kuula yimaaddo oo kaaga muraad qunsado, adiga ayaa liite ah oo aan waxba ku wanaagsanayn, ama wax raga-

nimo ah lahayn. Maahmaahdu waxa ay dhiirinaysaa waaya-aragnimada.

3. Hal Libaax arkaysaa ma godlato.

Maahmaahdan waxaa loo cuskadaa, marka ruux arrin laga dhawrayo, uu ruux kale oo uu tix gelinayo araggiisa ama joogistiisa ku diidayo ama kaga meer meerayo. Oraahdani waxay baxday (sida la yiraahdo) ma ruux dumar madal markhaati loo keenay, hase ahaatee, ruuxa maragga lagu furayey oo ay qadderineysay awgeed ay maraggii furi weydey.

4. Nin dameer wataa dad la tooyasho ma aha.

Maahmaahdan waxa loo cuskadaa ninka ama ruuxa dad aanay isku dan ahayn, ku dayashadooda isku doormooda? maahmaahda waxaa bixiyey nin safar ahaa oo tub dheer hayey, gaadiidkiisuna dameer ahaa. Markii ay safrihii awrtu u rarrayd, marba meel degeen ee ku nasteen buu yidhi, «Anigu nin bacadle awr wata tallaabo lama wadaagi karo ee waa in aan marka ay meel degaanba socodka sii biirshaa, si aan cidla' la iigaga tegin.

5. Midho gunti ku jira kuwo geed saaran looma daadsho.

Maahmaahdan waxaa loo cuskadaa, ninka hanti gacantiisa ku jirta ka hanqal taaga ee yidhaahda, mid meel kale lagu sheegay baan haybinayaa.

Oraahdu waxa ay baxday, markii qoon rag ahaa, oo midho guranayey nin ka mid ah tacabkiis u sitey ka hanqal taagey, ee yidhi ku geedkaas ku yaal baa aad u bislaaday oo aan soo guranayaa. Kuwan horena waa aan iska qubayaa.

2. *Qaybta murtida :*

Murtidu waxay maahmaahda kaga duwan tahay,

iyada oo ah oraah xikmad iyo falsafad dacalka ku haysa.

1. *Cilmigu waa caqli la biirshey.*

Murtidan waxaa loo cuskadaa, markii guddoonima ra'yi maskax wanaagsan ka soo burqaday, oo qodob cilmi ah waafaqsan la arko.

Murtidani waxa ay baxday markii uu nin Soomaaliyeed oo gar yaqaan ahaa arrin markeedii hore sharciga Islaamka la xidhiidhey ka garnaqay, ee haddana isaga oo aan waxba ka aqoon sharcigii oggolaysiiyey. Markii nin Shiikh ahaa xaajadii loo keenay, ayaa shiikhii weydiiyey oo yidhi: «Haddii shareecada aanad waxba ka aqoon sidee baad xukunkan u sugtay?» Nin kii baa yidhi: «Shiikhoow cilmiguba sow caqli la biirshey uun ma aha?».

2. *Doqoniino waa shil,*

Murtidan waxaa loo cuskadaa markii ay arrin sabab aragnimo darro ku timid, guul darro dhaliso. Waxa kale oo loo cuskadaa marka arrin la rabo in lagu dhaqaaqo la isku guubaabinayo, oo la yidhaahdo: «Waar doqonnimo waa shil ee meesha inaga kiciya».

3. *Nin ku arkaya looma sare joogsado.*

Waxaa loo cuskadaa qofka inaad u maad leedahay ama u baahan tahay ku og ee haddana lagugu canaanto maad u tagtid ama is xasuusid ?

Murtidu waxa ay baxday, markii uu nin Soomaaliyeed oo markiisii hore hodan ahaa hantidii ka yaraatee, ee soddoggii oo isla markaasna abtigii ahaa, la yidhi: «Waar maad abtigaa baa xoolo wadi waayey xaaska u dirtid carruurta wax ha uga doontee». Markaas buu isaga oo caddaynaye inaan abtigii xaalkooda mooganayn yidhi: «Nin ku arkaya looma sare joogsado».

*4. Suldaanow, saydh tegayey baan soor ka reebayey.*

Murtidaan waxaa loo cuskadaa marka laba arrimood oo ay mid deg deg tahay kugu kulmaan ee aad tii tegeysey horreysiiso. Waxa kale oo loo cuskadaa arrin kasta oo si deg deg wax looga qabto u baahan.

Murtidan waxaa bixiyey nin beeraley ahaa oo Raage Cadduur la odhan jirey. Raage, iyada oo ay xilli dayreed tahay oo uu beertii qodayo ayey farriini Suldaankii degmada xukumi jirey uga timid oo la yidhi: «Degdeg xaruntii Suldaanka u kaalay». Raage wuxuu goostay inuu hogosha dayreed ee tegeysa horta beerta u diyaariyo, dabadeedna boqorka u tago. Markuu Suldaankii oo caraysan u tegey ayaa sababtii uu ku daahay la weydiiyey, isaga oo run sheegayey ayuu Raage ku jawaabey, «Suldaanow, Saydh tegayey baan soor ka reebayey».

Saydh: waa hogol roob oo muddo gaaban da'da dabadeedna markiiba qaadda; Waxay wadataa, dabayl iyo onkod.

*5. Nimaan kuu furi doonin yaanu kuu rarin.*

Murtidan waxaa loo cuskadaa, marka ay cid aan dantaada wadini, damacdo in ay ku lug gooso, oo waxa aanad awood u lahayn kugu taarto, ama ay meel dani kuugu jirin kugula taliso.

Murtidu waxa ay baxday mar ruux miyi ku noolaa oo aad u ciidan yaraa, meel fiicanna iska degganaa geeddi lagu la taliyey, oo markii ciidan yaraan ka cawdayna Anagaa ku caawini doonaa la yiri. Markii maalintii dambe la degey, ayaa uu wax awrtii la fura, wax reerkii la ooda, iyo cid xoolihii la xeero gelisaba waayey markaa, buu isaga oo in la lug gooyey yaqiinsaday yidhi : «Iga dambeeyow nimaan kuu furi doonin yaanu kuu rarin.»

Shaydh; waa hogol roob oo muddo gaaban da'da, dabadeedna markiiba qaadda; waxayna wadataa dabayl iyo onkod.

## CASHARKA XVII

*SIDA BANJOOGTAAN CIDLA' BEEGSADAY (Curis)*

Duhur dabadii baa iyada oo nabad iskaga deggan yahay qaylo yeedhay. Ilmilicsi gudaheed baa qaylo iyo fuula la iswada gaadhsiiyey intii raggu gummaanka ku maqnaa. Haweenku hubkii iyo heensihii bay sii diyaarinayeen. Maalintaas qalabkii heensaha la iima dhammayn. Sitaacii iyo waxyaalihii la midka ahaa ee faanka iyo xarragada waa la iska dhaafay.

Jaallahay, markii uu qalab saarkii ii dhammeeyey, ayuu ii soo taxaabay oo bartilmaameeddii colku ka ambabaxayey i keenay. Intii la isa sugayey, oo dhan gaaddada iyo baarkuu ii salaaxayey. Waa gacan aan bartaye, aniguna xoodasho macaansi baan sarraxa kor ula taagayey. Saaxiibkay, intuu bur geedo ah xuluul ka soo gooyey, afkana ii geliyey buu igu yidhi. «Dagaal baa maanta ina la soo dersey waa inaan sidii la inagu yiqiin uga soo guul hoynaa». Afka kalama hadlin, uurkase waannu iska garannay.

Markii socod loo darbaday, ayaannu aniga iyo jallahay, safkii kowaad istaagnay. In yar dabadeedna dooyadii hore loo diray baannu hoggaaminey. «Dabro iyo weerar baynu geleynaaye, waa in aanad marnaba dekaamin» ayuu saaxiibkay markii la dhaqaaqay intuu cidhibta igu gujiyey, yidhi :

«Waa baqe iyo ban baa lagu yidhi». Inta la isweydaarsadey ayay labadii col badhtamaha isu galeen oo gigta rasaasta iyo galalacda waranka mooyaane wax kale la waayey. Dhinac kastaba baro-roob la moodo ayaa nala kaga soo furay. Inta faras geesigii ku joogey gumuc la tegey ee agtayda walhanayey lagama sheekayn karo. Dinnaagada qoryaha, sawaxanka rasaasta, iyo

bulxanka fardaha nin joogey mooyaane, nin maqnaa waxba kama garan karo.

Inkasta oo ay waxaasu dhacayeen, geeriduna aad u fara badnayd, haddana ruux dib u laabmay haba yaraatee ma jirin. Waxay higtaa iyo hamtaa haysoba suluftii iyo qaacii sannaddaa cirkaas isku shareeray, waxaana gadaalkii la isula tegey gacanta.

Jaallahay isaga goobta dhexdeedii is laba rogay, saaxiibbadiisna guubaabo iyo geesi gelin uga baaqaya, ayaa ay jeeniga dabadii rasaasi ka cuskatay. Dhinac inta uu iiga dhacay, ayaa uu dhulka is-geelaanshey. Digtii uu dhacay baan dib u jalleecay, mise geenyo geesigeedii la diley oo salabaynaysa baa intay ka dul booddey afka awaare iyo ciid uga buuxisey. Damqashadii xanuunka mar kali ah uma digiigixan ee gawsuhuu is-geliyey.

Baydadkii iyo buubaal roorkii ayaan baal u saydhmay. Markaas ka dib geesigii i jarabaray dib uma arag. Ciidankii markii ay guryo noqdeen anigu cidladii baan keligey ciirsi la'aan ku hadhay. «Guuldarroy gegi bannaan i taag» bay arrintay ku dambeysey. Waxa aan caymad iyo baydad colkii daba joogoba, gurigii baa gataati dhac ku gaadhey, hase yeeshee, gacaliyahay uguma tegin.

*Erayga iyo sharaxooda :*

1. Taxaabay: hoggaamiyey, kaxayey
2. Sarraxa: qoorta, marmarka
3. Xuluul: geedaha dhirta ka hoos baxa ee aan cidi daaqin
4. Darbaday: diyaar noqday
5. Dooyadii: ilaaladii
6. Dabro: rogaal, waran celis
7. Dekaan: daal, caajis

8. Walhasho: baydad, cidla carar
9. Dinnaago: sanqadh
10. Bulxan: danan, sawaxan
11. Suluf: urta, iyo kulaylka rasaasta, sunaadha
12. Is-geelaanshey: dhacay
13. Salabaynaysey: buubaysey, walhaneysey
14. Digiigixan: damqan

**Weydiimo :**

1. Waa-ayo ruuxa hadlayaa? Waa ayose jaallahiisa uu sheegayaa?
2. Maxaa qalabkii heensaha loogu dhammayn waayey ee qaar looga tegey?
3. Maxaa isaga iyo jaallihii hore loogu diray?
4. Maxaa jaallihii ku dhacay?
5. Maxaad ku tilmaami lahayd jaallihii inuu ahaa?
6. Dhinaca aftahammada, maxaa lagu magacaabaa sheekada noocan oo kale ah?
7. Qor curis gaaban adiga oo «waran» sidii wax hadlaya ka dhigaya.

## CASHARKA XVIII

*CAGA LA'AANTAY CIIDO IGU ARAGTAY (Curis)*

Meeshu waxa ay ahayd xeeb, xilliguna xagaa. Cirka xasaag daruureed laguma ogeyn, dhulkana wadaanta la jiidaa xaab kama soo qaadeyn. Galbeed baannu u jeednay. Baabuurka daaqaddiisa bidix oo Koonfur xigtey waxa nooga soo geleysey dabayl hanfi ahayd, oo quruurux dhimbiilo naareed la moodo nagu dabanaaninaysey. Si aan indhaha u badbaadiyo, waxaan isu barbaarinayey dhinaca midig oo ay dabayshu u dhacaysey, oo wadaha baabuurku iga xigey. Hore markaan u ruqaansado, aniga iyo kursigii aan ku tiirsanaa baa dhidid deraaddii shaatiga kala jiidaneyney.

Baabuurka waxaa wadey Cali Yare oo uu dhalay nin hantiile ahaa. Cali Yare lix jirkiisii baa dugsi lagu geeyey, hase ahaatee, qolka afraad markii uu marayey buu ibtiloobey oo qaad, sigaar, iyo waxyaalo kaleba bartay. Aabbihii iyo hooyadii midkoodna meesha dugsigu magaalada kaga yaal ma aqoon. Cali Yare wuxuu caado ka dhigtay in uu marka subaxdii dugsiga loo dareero, buugaagta dukaan dhigto, duhurkiina ka soo qaado, oo guriga u soo qado doonto. Muddo dheer buu meesha uu ku qayliyo, dukaanka uu buugagga dhigta iyo guriga aabbihii ka dhexeeyey, dugsigana aanu haba yaraatee ka soo daahirin. Waalidkii wuxuu ku odhan jirey, imtixaankii laa qaadoba, ka kowaad ama labaad baan noqdaa.

Maalin maalmaha ka mid ah buu Cali Yare dugsigii tegey, isaga oo muddo badan ka maqnaa. «Waar Cali xaggee baad ka timid»? macallinkii baa weydiiyey. «Waar waan bukey, oo isbitaalkaan ku jirey», Cali baa macallin ugu jawaabey, intuu codka buuray. «Keen warqaddii takhtarku ku soo siiyey». «Yaa warqadba na soo

siiyey.» Cali baa yidhi inta uu faraha taagtaagey. «Waar orod oo waalidkaa u yeedh».

Cali isaga oo gunuusaya buu irridda ka baxay, waxa uuna subaxdii dambe keenay habar aan hooyadii ahayn, oo uu intuu shan shilin siiyey suuqa uga soo yeedhay; waxa uuna kula soo heshiiyey inay hooyadii sheegto. Markii islanntii maamulihii dugsiga u timid, ayuu magaceedii weydiiyey. «Magaceen waa islaame' Cibaado Geeddi baa lay iraahdaa. «Maamulihii buuggu ardayda magacyadoodu ku qorraayeen, inta uu la soo baxay ayaa uu ogaaday in wiilkii hooyadii kaaha Faarax la yiraahdo. Aad intuu u carroodey buu habartii ku yidhi. «Orod, iska tag, waalidnimada haddii aanan kugu dhaafayn booliska aan gacanta ka saari lahaayo».

Ardaygii markii uu ogaadey in xeeladdiisii la ogaaday, ayuu intuu iska cadhaysiiyey dibadda u boodey oo xafiiskii iyo macallimiintii shiid hadhka kaga dhigay Dhagxantaas midkood buu maamulihii madaxa kala helay. barayaashii qacdiiba shir bay u fadhiisteen. Waxa ay go'aan ku gaadheen, bal maantana ardayga loo dhaafo, si aanay ciqaabtu aar gudasho ugu ekaan. Hase yeeshee, Cali waxa uu caado ku dhigtay in uu markii uu dugsiga yimaadoba qas iyo qalalaase ka tuuro. Markii uu doonana iska maqnaado. Ugu dambayntii Cali sidii uu doonayey baa dhacday - dugsigii baa laga cayriyey.

Odaygii markii uu oggadey in dugsigii laga eryey, ayaa uu asaguna dayriyey. Cali Yare waxa uu yiqiin baabuur wadidda, oo uu fatuurad aabbihii lahaa ku bartay. Beryo markii ay busaaraddii dubatey, ayaa maalintii dambe dawladda shaqo baabuur wadis ah ka helay. Mushaharkiisa ka sokow, waxa uu ku tiirsanaa hooyadii oo kiish lacag ah barkanayd.

Kulkii iyo hanfigii xeebta waxa aanu, jaaha u dhignoba waxaanu meel hortayada ahayd aadna nooga durugsanayd, ku aragnay bidhaan sii mutulan. «calow waxaa horteenna ka sii muuqdaa ma qof baa? «Qofku madoobaa miyaanu huba sidan?» Cali baa iigu jawaabay. Hadalkii intii aanu afkayga ka soo wada bixinba bidhaantii baanu soo gaadhney. Bidhaantii dad bay noqotay. Waxa uu ahaa nin ugu yaraantee toddobaatan sano baarka ka gooyey. Hilib waa ka dhammaaday, haraguna lafuhu ku dhegey, haddii uu haragba ku hadhay! Wax yar markii aannu u soo jirney, ayaa uu deymo, taagdarradiisa muujineysey na soo deyey, oo ul uu ku tukubayey noo taagey.

«Waar u jooji, u jooji», Cali baan amar degdeg ah ku ridey. «Naga daa baabuurku markuu kululyahay waa u halis joojinta badaniye», Cali baa ka cawday. «Waar jooji baabuurka ruuxa waayihiisa waxba kama ogide». «Waar ninyohow bahalku ma caanaley baa habartii walba u jooji uun baad tidhaahdaaye. Cali Yare intuu baabuurkii xejiyaha ku joogsadey yidhi. «Ma ogatahay Calow baabuurka in aynaan dadweynaha ka xigin, ee aynu iyaga ugu shaqayno?» ayaan idhi Cali ma garawsan, hase ahaatee amarkii qayaxnaa ee aan ku ridey buu u hogaansamey.

Baabuurkii intaan ka degey, ayaan hadhkiisii istaagey intii uu duqii na soo gaadhayey. Duqii orod buu isku soo deyey markii baabuurkii istaagey, hase yeeshee uu hidin waayey. Gacanta inta aan u hilay, ayaan u sheegay inuu qunyar iska soo socdo oo aan laga tegeen. Alleyle waxa uu kacakufooba wuuna soo gaadhay. Markii baabuurkii lugta midig ku qonofsaday, ayuu tii kale soo qaadi kari waayey. Aad buu u hantaaqmay markay lugtii kalena u soo fakatay, xooggana nabar yar baa ka

gaadhey. Garabka intaan soo qabtay, ayaan baabuurka xaggiisa hore u soo wareejiyey oo kursigii aniga iyo wadaha noo dhexeeyey ku fadhiisiyey.

Allayle sidaan horeba u soo sheegnay, waxa uu ahaa nin da' ah, oo taag darrona ugu darsantay. Beerka iyo bogga baahi iyo darxumo awgeed isku dhegay. Xididdada jidhkiisuna dhammaantood dibedday u soo wada baxeen, indhuhuna aakhiray ka soo jeesteen. Wax alaab ah, laba go'oo idlaad ah, ul iyo weyso buraashad ah oo cad buu sitey. Dhabarku wuu soo xoodmay, dhaayahana aragoodu ma fiicnayn, hase ahaatee usha looma hayn.

Agtayada waxa ahaa geed aan ayaan sii horreysey abeeso ku diley. Geedku maalinba maalinta ka dambaysa ayaa uu hoosta ka soo aasmi jirey, sababta oo ahayd iyada oo ay dabayl xagaadu bacaad ku tuuli jirtey. Maalinta aan waddada maroba geedka waan fiirsan jirey.

«Calow bal hadda wax baan ku tusayaaye soo deg» baan wadihii ku idhi, markii uu duqii fuulay. «Waar maxaad aragtay?» Cali baa i weydiiyey intuu daaqaddii iska furay. «Meeshan aan ku taagnahay ma garannaysaa?» ayaa aan ku idhi, intaan meeshii geedku ku yiil isku taagey,» Maya, ee maxaad uga jeedaa? , dareewalkii baa i weydiiyey. «Waar meeshii aynu abeesada ku dilley miyaanay ahayn?» «Waar naga tag malaha waad asqoodaye, mee geedkii yaraa ee aynuu bahasha ku dhex dilnay?» Intaan ugu fiiqay, baan idhi, «Miyaanad arkayn, waa taa raqdeediiye?» «Waar waa runtaa ee geedkii yaraa mee, miyaa la gooyey?» Cali baa isweydiiyey. Qori intaan qaatay baan meeshii geedku ku yiil bur yar oo ka samaysmay ku baarbaaray, ayaan markiiba ay laamihii u sarreeyey soo baxeen, Cali tusay oo idhi, «Waa kan geedkii oo dabaysha aqal ka dul samaysatay.» Allayle isaguna intaa dhabannaduu gacmaha ku hayey,

waana na dhegeysanayey. Cali baa inta uu yaabay, yidhi, «Dabayshu haddii ay naxariis leedahay, geedka ma aasteen, isna hadduu cago leeyahay waa uu iskaga carari lahaa». «Geedku haddii uu inala hadli karayo, wuxuu odhan lahaa caga la'aantay ciddu igu aragtay», ayaan Cali ugu jawaabey aanu baabuurkii dhaqaajinnay ayaan Allaale waraystay, oo idhi, «ee bal warran maxaa sidatan kuu liciifiyey, maxaase cidlada kugu soo kellifey?» «Wax aan aadne waxba iiga qaban karin baa i haya maandhe.» Allaalaa ii cawday. Waraysigii markii aan ka deyn waayey buu yidhi, «Yaraan baa qurbaha ku gallay - cimrigaygii iyo wixii aan xoogsadayna waa aan ku loofaray. Aniga oo tinka cirro i wareemay, adduunna wax aan buurreyn sita baan dalka ku soo noqday. Wixii aan sitey baan geel iyo adhi siisey gabadhna waa guursadey. Shan carruur ah oo toban jirku ugu weyn yahay bay gabadhii ii dhashay. Xoolihii abaarta aad maanta arkaysaan baa xasuuqday, xaaskiina laba habeen buu umulanaa. Sida geedkaas dabayshu u duugtey bay anna waayaha adduunku ii dabooleen». Hal cabbaar ah inta uu aamusay buu yidhi, «Allaa i lehe anigay caga la'aanta ciiddu igu aragtay».

*Su'aalaha ka jawaab :*

1. Dabaysha dhacaysey magaceed?, Maxaase kulaylka ugu wacnaa?
2. Dhulku dhir iyo geedo ma lahaa?
3. Muxuu ninka hadlayaa, dhinaca midig isugu barbaarinayey?
4. «Aniga iyo kursiga aan ku tiirsanaa baa shaatiga kala jiidaneyney» Muxuu uga jeedaa, ninka hadlayaa? Maxaase u sabab ah kala jiidashada?
5. Cali Yare reerkooda noloshiisu sidee bay ahayd? Maxaase dugsigii ka kaxayey?
6. Markuu maamulaha daqray maxaa loo eryi waayey

ama loo xidhi waayey?
7. Maxay macallimiintu waalidkii ugu yeedhi waayeen?
8. Bidhaantii waddada ninka hadlaya iyo Cali Yare uga muuqatay maxy ahayd?
9. Cali Yare muxuu baabuurka in uu joojiyo u diidayey, muxuuse ninka kale in baabuurka la joojiyo oo odayga la qaado ugu adkaystay?
10. Muxuu Maxamed, Cali Yare geedkii aasmay tusiddiisa uga jeeday?
11. Sheeg xidhiidhka ka dhexeeya geedkii aasmay iyo odaygii taagta darraa, ee jidka marayey?
12. War gaaban ka bixi noloshii Allaale.

*Erayada iyo macnahooda :*

1. Hanfi: kulayl dabayli weheliso.
2. Quruurux: finiin, ama dhagxan yaryar oo dabayli waddo.
3. Ibtiloobey: xumaaday, balwad yeeshay.
4. Gunuus: hoos u hadal xumaani ku jirto.
5. Dayriyey: eryey, waxna siin waayey.
6. Mutulan: bidhaan aan aad u muuqan.
7. Xejiyaha: joojiyaha baabuurka.
8. Hantaaqmay: dhacay, lug-go'ay.
9. Liciifiyey: lafajebiyey.

*Sharaxa weeraha iyo odhaahaha soo socda :*

1. Cirku xasaag ma lahayn.
2. Wadaani dhulka xaab kama qaaddo.
3. Waayahaa i daboolay.
4 Qas iyo qayaxan.
5. Amar qayaxan.
6. Waxaan aadane waxba iiga qaban karin.
7. Xoogsigii baan ku loofaray.

Cinwaanka hoos ku qoran qaado, dabadeedna curis gaaban ka qor «Daymo caal waaya».

## CASHARKA XIX

### *ANIGII ROONAA BAY I ROGTAY:*

*(Ibraahim Cali Rayaale)*

Aroor hore oo suuqa teel-teel loo marayo, magaalada inteeda badanina huruddo, ayaa uu baabuur la soo galay. Wuxuu ka soo kacay meel shan habeen oo cunaqabad ah laga soo dhaxo. Baabuurka waxa uu ka soo degey isaga oo dayeysan, cadceeduna ula eg tahay halkay ka dhici jirtey in ay ka soo baxayso, «Waar waa sidee», ayaa uu yidhi isaga oo isla hadlaya, «sow tan dunidii is-daba martay?

Wejigiisa waxa ka muuqday, daal, jactad, darxumo iyo lulo badan oo ku gaagaxday. Budkii inta uu cuskaday, go'iina hilaabtay ayaa uu sidii neef dhukaan qaba dugdugleeyey oo gidaar halkaas ahaa fadhiistay si uu u wareer gooyo. Cabbaar hadduu fadhiyey, ayaa uu siigadii iska garaacay, indhihiina marmartay. Waa cir kaa dheer oo dhul kaa dheer. Wuxuu dhex joogaa Xamar Cadde oo aanu qofna hebelow ka odhanayn. Kuma darin Xaaji kooskii uu soo doortay ee ku yidhi: «illaa waa illaa, adeer Xamar iigu kaalay, shaqaan ku siine». Shaki kuma jiro in uu arrinkiisu, «Allay wada Nebi wada ahaa.» Daal awgii ayuu xaglaha loodin kari la'aa, oo waa uu kuurkuursanayey. Waxa taa kaga darraa, baabuurrada xiinkoodii iyo buuqii oo dhega barjeeyey; waxa aan u badiyey baallaa daymood iyo hadba dhan u barriiqasho. Waxa uu ku soo baxay laba nin oo maqaayad hor fadhiyey. Markuu nabdaadiyey, dabadeed ayuu yidhi isaga oo aan wax dareen ah is-gelin «Waar ninka la yidhaa Xaaji Koos oo Baarlamaan ah ma taqaannaa»? Inta ay kor iyo hoos u eegeen bay is-fiiriyeen oo mid yidhi, «geed cusub waaye», «Xaaji Koos ma sheegaysidoo —— ——— ?». Kaas maba la kasi waayayo». «Haa adeer»,

ayaa uu yidhi inta ay neef qaboobi ka soo booddey, «Waa reer hebel e.» Labadii nin baa isu il jebiyey oo is asaraaray. «Hadda waa ciddaas kuma lahaynoo» iyo «maya waa ciddaas baad dhehday». «Fariiso oo shaah cab hadda lagu wadaaye» «Ma rinji mise caddays?» ayaa ay gabadhii ku tidhi. «Naa rinjiga ma cabbaye fiijaan caana leh ii keen», ayuu yidhi; markuu intii u danbeysey hiinsaday ayaa la hor galay, waxana lala tegey xeebta Liido, boqol shilin oo uu haysteyna waa laga maroojiyey.

Magaaladii ayaa uu ku soo noqday isaga oo yara sirinsirqaysan. Dhawr xagtimood iyo hagardaamooyin badanna qaba. Cabbaar ayuu muusanaabay waase laga hoos qaadi waayey. Magaaladii ayuu hadba gees u cararay oo kolba nin meel maraya u qayshaday, waxase wax walba kaga darraa dadkan idil ee aan dhibaatadiisa dhegba jalaq u siinayn. Wuxuu is yidhi malaha dumarka ayaa roone iyaga warayso. Waxa ka hor timid gabadh gaangaabinaysa. Waxa uu yidhi intuu garab galay, guntiimadiina dacalka ku dhegey, «Naa gabadhaay Xaaji Koos ma taqaannaa ———————— ? Inta ay iska gundhisey, wejigana giir ka kicisay ayay tidhi «Waar kac reer baadiyeyahow», socodkiina horay ka wadatay, iyada oon is-lahayn cid baa kula hadashayba.

Waxa uu wareegaba gidaar hoostii ayaa uu ku gataati dhacay. Casar gaaban hadday tahay ayaa uu so hambaabaray, mise go'ii iyo kabahii ayaa maqan oo laga dul qaatay. Waxa uu yidhi, «Xaajigayba dhacaye xaggeen kabihii iyo go'ii u doontaa». Habeenkii oo dhan waxa uu qofkii ka soo hor baxaba weydiinayey, Xaaji Koos ma taqaan?» dadkuna wuxuu kala baydhi waayey, «ma kasayno». Maalin afraaddii ayaa uu isaga oo hiil iyo habarba u jabay helay nin ay baadiye isku yaqaaniine.

Kiiba kaxeeyay oo sheedda ka tusay aqal weyn oo nin hor taagan yahay. Waxa uu ku yidhi, «Xaaji Koos halkaasuu galaa». Ninkii waardiyaha ahaa baa sii dayn waayay oo mar ku yidhaa ma joogo, marna ku yidhaa hadhaw soo noqo. Markii looga dhaartay ayuu is-yidhi xagga danbe maad ka dhacdid oo gudaha gashid. Nasiib darro askari gudaha beer ku waraabinayay ayaa qabtay, waxana loo gudbiyey Saldhigga Booliiska oo ku dhawaa.

Maxkamadda maalintii la geeyey, waxa loo yeedhay afadii Xaajiga waxana la weydiiyey, «ninkan ma garanaysaa ——— ? «Waxay tidhi», Haa waa tuug nacasa dharka carruurta naga gurta». Garsoorihii baa yidhi, «Axmad Jaamac, waxa kugu caddaatay danbiga la yidhaa (House tres-pass), waxayna maxkamaddu kugu xukuntay lix bilood oo xadhig ah».

**Layli :**

1. Ninku meel intee u jirta Xamar buu ka yimi? Muxuuna u socday? Hadmuu Xamar soo galay?
2. Nimankan uu la kulmay daacad ma ka ahaayeen ninka dhibaatadiisa? Maxay iyagu u geysteen ?
3. Maxaa dhibaatooyin kale ka qabsaday magaalada, intaanu gaadhin gurigii Xaaji Koos?
4. Gurigii hadduu gaadhay ma la kulmay muxuu filaayey?
   Sababta maxay kula tahay adiga?
5. Maxay ahayd sababta uu Xamar ugu soo kacay?
6. Muxuu markuu baabuurka ka soo degay u fadhiistay?
7. Labadii nin ee uu maqaayadda ugu yimid maxay ahaayeen? Muxuuse kala kulmay?
8. Muxuu gurigii Xaaji Koos kala kulmay?
9. Safarkiisii wax weyn buu ka faa'iideystay, maxay

yihiin waxaas uu faa'iideystay?
Curis gaaban ka qor nin reer magaal ah oo markii ugu horreysey miyi u baxay; cinwaanna u dooro curiskaaga.

## CASHARKA XX

### *CALAS IYO CADDUUR*

Calas iyo Cadduur waxa ay ahaayeen wada jirato Han iyo halaabadba inay wadaagaan u ballamay. Xagga guga isku fac bay ahaayeen, wax wada qabsigune walaalo doog iyo abaarba iskaashada. Geelu, tan iyo maalintii ay dab ka baydheen, wuu isugu jirey. Weligood qayb wadaag bay lahaayeen oo midkoodna kan kale wax ma dheeraysan. Niman is-xog og bay ahaayeen oo waxba uma kala qarsoonaan jirin.

Marka geela laga caano lisayo, Cadduur baa haaneedka qaban jirey. Calasna midig lisuu ahaa. Maagaabada Muuse Yaraa iska lahaa, ibdarkana odayga Umal oo sabool ahaa. Wiilasha yar yari markay geela ka caano dhamaan, weelka guryaha ka yimaaddana la buuxsho, ayay Cadduur iyo Calas soo caano maali jireen, oo wadaag hadhuubka isu dhiib dhiibaan. Cadduur nirgaha aad buu ugu roonaa, oo inta uu marka hore dhufsiiyo, ayaa uu gadaalkiina dharaq u reebi jirey.

Waxa ay caynkaas u wada dhaqmaanba, Cadduur baa cishadii dambe guursaday oo gabanadii ka hoydey. Hawlo badan baa Calas markaas ku soo baxsaday. Cadduur waxay walaalo ahaayeen gabadh yar oo markaas loo reebay. Calas isaga oo saaxiibkii hadal u dusinayey, ayaa uu yidhi, «Waar Cadduur, dee adigu aayahaagi dhistaye, hadmaad anna dhaxanta iga hoyneysaa?» «Kuu diyaar baan ahaye, soo il-dayo.» Cadduur saaxiibkii buu ku yidhi. «Oo maxaad ii fogeyneysaa maad i soo dhaweysidba?» «Oo dee ma yartaad leedahay iigu dun xidh?» «Hadal waayeel waa guud mar ee haa.» Calas baa yartii Cadduur walaashii ahayd guddoontey. Xishood

iyo xaqdhawr xididnimo ayaa, labadii nin xaaladdoodii hore ugu sii darmaday. Muuse yare oo Cadduur walaalkii ahaa baa Calas geelii la raacay, ileyn Cadduur haatan cuslaaye. Muuse nin sidii walaalkii u feegigan xoolahan ugu roon ma ahayn, ee xoolo xume, dhega adag buu ahaa. Maalintii dambe ayuu Calas geeli yarkii seeddigii ahaa kob barwaaqo ahayd kula soo dabbaalay oo markii uu xasilay ku yidhi, «Muuse, geela isha ka eego yaanu kobtaa ka bixin, haddaan kuu soo noqonayeeye».

Mar alla markii uu dhaqaaqay, ayuu yarkii barqolibaax madaxa iyo manjaha maray, geelina kamaba dambeyne hawdkiisuu xulay. Gabbal gaabkii ayaa uu Calas soo noqday, mise cayn xoolaadba carrada ma joogto. Waxa uu geelii raad guraba, wuxuu geelii raad guraba, wuxuu hadba geed dheer karo, oo bidhaan eegoba, geelii buu goor fiid ah baadi doon ku helay. Raacdadii geela yarkii baaba kaga darraaye, ruuxiisiiba waa uu waayey. Waxa uu u qayliyoba, mar dambe ayaa uu kii oo soo hambaberey meel halkan ah «hee» ka yiri. Intay neefi ka soo boodday, buu yidhi, «Waar ma nabad qabtaa?» «Haa». «Oo goormaa geeli kuugu dambeysay?» «Markii aad iga dhaqaaqday baa xanuun Eebbahay ii keenay oo aan miyir beelay; iminkana geelii meel uu jiro garan maayo». calas intuu aad u dhirfay xishoodna xakameeyey buu gabay ku yidhi :

«Hadduu seedigaa gaban yahay, oo geela kula raaco.
Oo aanad guulguuli karin geeluse hallaabo,
Illeyn waad galgalataa sidii gaajo nimay hayso».

Cambaro, Cadduur walaashii wax la koriyoba waxay baarka feedhoba, afar iyo toban jir maalintii ay gaadhey ayaa uu Calas u soo geed fadhiistay. Walaalkeed, ayaantaas ka hor in uu nin dunta ugu xidhay, uma

uu sheegin. Calas isaga oo aan waxay Cambaro dabo ka noqon doonto ka warqabin, buu aqoontiiuu marwadii iyo mudanihii iska dhalay u lahaa ku dirgursadey. Ereyga iyo sharaxooda :

1. Halaabad: dheef
2. Haaneed: dhinaca bidix ee geela marka la lisayo haruubka lagala galo
3. Maggaabo: cantuugo, af muggii (marka hasha la liso ayaa inanka soo godlaa, nirgahana ka celiyaa caanahana la cantuujiyaa)
4. Ibdar: hambo, ama in caano ah oo haruubkii la shubayoba ama hashii la lisoba laga reebo oo dadka aan geela lahayn ama saboolka meel loogu shubo.
5. Dhufsiiya (dhufsiis) : marka ay hashu, magawdo ayaa nirigta cabbaar intaan lisin loo daayaa.
6. Dharaq: hambada nirgaha hooyadood loogu reebo
7- Xoolo xun: xoolo dayac
8. Xasilay: daaqii ku degey, kaynaan gooyey
9. Barqo-libaax: hurdo maalmeed oo dheer
10. Guulguul: dilmo iyo canaan.

**Weydiimo :**

1. Wax ka sheeg siday Calas iyo Cadduur isku ahaayeen?
2. Imise meelood baa hasha marka la liso caanaheeda loo qaybiyaa?
3. Maxay ku tusaysaa deeqda «ibdarka» loo yaqaan.
4. Waxa lagu maahmaahaa: «Magacaabo geel maalin gelinkeed bay ku wadaa», ee maxaa looga jeedaa?
5. Muuse Yare muxuu walaalkii kagaduwanaa?
6. Muxuu ku tusayaa, gabayga Calas dhinaca dhaqanka marka laga eego?
7. Muxuu Calas gabadh yar ee waxay noqon doonto aanu ka warqabin dunta ugu xidhay?
8. Adigu ma raacsan tahay, guurka noocaas ah? Faallo gaaban ka bixi, adiga oo sababaha sheegaya.

## CASHARKA XXI

### *CEEL BADANE LAGU SHEEG*

Warfaa waxa uu ahaa ina Warsame Geeddi. Wuxuuna ku dhashay meel hawd guntii ahayd oo Harooyinka aad uga durugsanayd. Iyada oo ay beeshu guri barwaaqo deggan tahay, duqeydu shir iyo sheeko, ku baraad la'dahay, dhallinyaraduna xarrago iyo haas-aawe guryaha dhexdooda hobshahobsheyneyso ayaa uu jiilaal dillaacay. Qaydarradii biyuhu waa ay gudheen, baadna wuu qallalay; xoolihii dulin baa ku dhashay. Dad iyo xoolaba waxay nafta kula eerteen dhacarasho. Dhaanku waxa uu dhexi jirey lix caano maal oo dhalan dhool ah. Inkasta oo dhoon horaaddada iyo dhoon dabadeedaba la soo dhaamiyona, kolleyba dhiilo har-raad baa la qabey.

Warfaa habeen «Koxdin Awr buu dhashay, kolki-ibana kulkaas iyo dhibaatadaa adduun buu la kowsaday. Dhibta iyo omoska jiilaal ka sokow. Reerku xoolo badan ma lahayn, sidaas darteedna, wiilku daryeel fiican ma qabin. Hal sano markii uu jirey, ayaa uu aabbihii hooy-adii furay. Inkasta oo ay in ay curadkeed qaadato ku dadaashay, haddana hangool buu Warsame wiilkii kaga reebay. Qobato oo dareen-wadayaasha, iyo dubaaqaba ka murugeysan, jaaqdii ilmeheeduna xanuun iyo calool-yow ku sii kordhisay, iyada oo dhaqaaq joogsanaysa, hadbana sidii ay cidi u naxariisanayso dib wax u soo jalleecaysa, ayay beerkeedii iyo baraadkeedii ka dhaqaaqday.

Gurigiiba intaan laga guurin, ayaa uu Warsame aqalkii madoobaa iyo oohintii ilamaha yar u adkaysan waayey. Waxa uu tebey dugsigii iyo daryeelkii sida uu Warfaaba naaskii hooyadii iyo goshii ay huwin jirtey u waayey. Calooolyow iyo isciilkaambi baa Warsame la soo

dersay, waxa uu goostay in uu bal mar labaad guursado. Waxa uu gabdhihii beesha joogey ilaadada ka meeriyeyoba, waxa uu galabtii dambe la kulmay inan awr carraabineysey. Waxay soohaneysey xadhig geeddi ahaa, oo ay rabtey in ay caws ku samaysato, goshana waxay ku sidatay maydhax, xidhmo maadh ahna waa ay xambaarsanayd Maro saddex qeyd ah, boqor darayo muus ah iyo dhacle xabbad qaadna ah bay inantu ku jookhnayd. Intaas waxaa weliba u sii dheeraa, qool cunnaabi aḥ, iyo jiman. Warsame, inta uu gabadhii isla taagey buu markii uu bariidiyey ka dib ku yidhi, «Naa waxaan ku weydiiyey awrtu gurigee bay ku carrabaysaa?» intay geed dhafaruur ah dhinaca kale sidii wax dhuummaalaysanaya ka martay ka tidhi, «Oo adigu yaad rabtey? Intii aanu u jawaabin, bay indhaha hoos u rogtey oo daymo xishood ilqodha Warsame kaga xadday.

Inta uu labada lugood isdhaafsaday, hangool uu siteyna taageertay, buu isaga oo qosol dhoolla caddaynaya yidhi, «Haweenow, idinku Xaawa iyo Aadan ma jikaar uun baydun wadi?» Jawaab kama uu sugine, geedkii dhinacii ay ka taagneyd intuu uga wareegay, ayaa uu beyaan gabadhii isu hortaagay,, oo dhammaanteed kor iyo kal isha ka meeriyey. Naasaha giigtiran, dhexda madagta ah, ilkaha dhayda ah, iyo cirridka dhuxusha ah, baa dhammaantood dhaayihiisa soo jiitey. Sanqaroorka toosan sunniyaasha geergeeran iyo sansaanka wejigeeda nin arkay mooyaane nin kale loogama sheekayn karo.

Dhaygag iyo amankaag isaga oo dhabannada haysta, welina aanay, sheeko haasaawe oo badani u kala bixin, bey yeedhi dhinaca bariga ka baxday. «Naa Cambarooy, naa maxaa aad awrta u soo carraabin weydey, ee kugu dhacay?» Warsame, oo wadnuhu fogtaa hayo

ogaadeyna in ay gabadhu ina Samantar Oogle ahayd, iyo cambaro oo fikir naxsan baa midba gees u dhaqaaqay.

Warsame illayn xoolo ku filan ma lahayne, inta uu xigtadii ku dhex dhacay buu yidhi, «Waar inaan gabadhii hore kala tagnay, waad la socotaan ninkii Warfaana tunka kuma sidi karo. Iminka iyo haddana, in aan Samatar Oogle la xididaa baan damcay xoolana waad iga ogtihiinee laba arrimood wax ha la iga la qabto». «Waa tan hore, ee Samatar Oogle ha la iila geed fadhiisto, waatan dambe ee naagta ha la igala yarad bixiyo.

Iyada oo lagu dhaliilay in uu ooridiisii hore xilkas darro ku furay, wax ma dhaqdena yahay, ayaa markii hore inaan wax kaalmo ah loo geestanaa lagu goostay. Hase ahaatee kulane oo nin duqa oo dad wadeenna ahaa baa, in aan maanta Warsame baahida lagaga tegin». Ayaa Kulane ku taliyey inaan cidla lagaga tegin ee wax la taro Kulane.

«Waar bawdyo rag maalinba mid baa qaawane, ninka gebegebeeyey». Arrintii waxa la sii gorfeeyoba, in Warsame gacan la siiyaa buu go'aankii ugu dambeeyey noqday.

Subaxdii labaad ayaa shan nin uu Kulane hoggaaminayey Samatar Oogle ardaa-dhig ugu tageen. Ardaa ayaa markiiba laga gig siiyey, oo raro isku joogyo, iyo googoosyoba lahayd, lagu dadbay.

Iswaraysi guud, sheeko, iyo kaftanno aan turxaan lahayn markii la kala dhammaystay, sooryadiina laga af qaaday, ayaa arrintii loo socdey la guda galay. Kulane baa hadalkii furay oo faatoxo iyo qader arar ahayd kaddib ujeddadii daboolka ka qaaday, oo yidhi, «Ina Samatar Oogle, ayaanu u soconey in aanu idinku la xididno, guud ahaan, gaar ahaanna, Warsame Geeddi iyo Samatar Oogle.

Kaahin baa hadalkii la wareegay oo yidhi, «Waa hadal wanaagsan oo la arki jirey. Anagana gabadhii waa naga gelbis. Sida aan xog ogaal u ahay Samatar gabadha hooyadeed labaatan dhogor ah, faras, iyo qori maadhiin yare ah buu ka bixiyey. Dee iyadana intii baa looga fadhiyaa». Cambaro meher baa loo dedejiiyey, hal sano kaddibna iyadoo lix awr loo soo raray baa Warsame loo soo wareejiiyey. Cambaro markii wiil bay dhashay Warfaana walaal buu yeeshay. Waa aaye aabbe, iyo camalkeede, Warfaa baa Cambaro waxa uu cunaaba buur kala weynaadeen. «Cirweynaa, miyaanu dhergeyn. Ma haan gun la' baa?».

Warsame waa dhintay, Warfaana rajannimadii bay agoonnimona ugu darsantay. Ciirsina Cambaruu u noqday! Warfaa Naaleeye Habacasane sidii aabbihii xoolo seeg ah ma ahayn; naf dhalad aan xoolo u sancanaynna sidii la moodayey ma noqon; ee halihii yaraa ee aabbihii uga dhintay buu dhaqaale iyo xannaano u dhaqaaqay. Warfaa geeliisa guri xun kuma furin; gaajo iyo harraad midnabana kuma eegin. Weligiina sheeko iyo dan la'aan waqti iskaga ma dayacin. Wuxuu shilinta: qodaxda iyo takarka ka ilaaliyoba geelii baa tarmay oo sannadba sannadka ka dambeeya sii kordhey.

Wax arrin socotoba subixii dambe ayaa nirigi xerada ku dhalatay. Markaas buu Warfaa intuu meel bannaan ah oo xerada kambalkeeda fadhiistay; milicda isu dhigay oo intuu weliba dooyeystey; gadhka salaaxay; isla markaasna in loo soo shiro cid u dirtay. Raggii baa u soo shiray; markii loo yimid ee la arkay; in uu qorraxda isu dhigayo; oo gadhkana salaaxayo ayaa la ogaadey in uu geelisii maanta boqol gaadhey. Markaas, sidii boqor la caleema saarayo, Salaan iyo hambalyo lagu boobay oo la yidhi, «Geel badane lagu sheeg».

*Ereyada cusub iyo sharaxooda :*

1. Qaydarra: Harooyinka, balliyada biyuhu galaan, waraha
2. Dulin: cayaanka xoolaha cuna sida shilinta
3. Dhacarasho: dhir calaashiga kolka la harraado
4. Caano-maal: godol, 12 saacadood, habeen ama maalin
5. Dhoomo: haamo la dhaansado, kuwa hore iyo kuwo dambe
6. Koxdin awr: habeen laga faashado, oo ninka dhasha la yiraahdo geelu uma bato
7. Dareen wadayaasha: meelaha wax laga dareemo,
8. Ciilkaambi: caloolyow, iscanaansho ciil
9. Maadh: caws ama geedo, rada laga sameeyo
10. Amankaag: yaab
11. Tunka: qoorta, dhegta
12. Ardaa-dhig: geed fadhiisi guur
13. Raro: cawsaska, kebdaha iwm.

**Weydiimo :**

1. Maxaa looga jeedaa: «Wuxuu Warfaa ku dhashay meel harooyinka aad uga durugsanayd» ?
2. Maxaa beeshii ku dhacay markii uu Warfaa dhashay?
3. Muxuu dadka hawdka degaa biyo ka dhigtaa haddii uu harraado, biyona waayo?
4. Maxay ku tusaysaa isfuristii Warsame iyo Warfaa hooyadii? Maxaad ku xukumi lahayd Warsame, haddii aad garsoore tahay? Waayo?
5. Maxaa Warfaa loo moodi jirey in aan weligii geel badan yeelan doonin? Maxayse sidaasu u beenowday?

6. Maxay Warsame xigtadii in wax la taro markii hore u diiddey?
7. Maxay Cambaro geedka dhinaca shishe markii Warsame u yimid uga martay?
8. Maxay Cambaro had iyo jeer Warfaa, cuntadiisa u hadal hayn jirtey?
9. Maxaa looga jeedaa: «bawdyo rag, maalinba mid baa qaawan»?
10. Muxuu Warfaa subaxdii geliisu boqol gaadhey cadceedda u fariistay ee dadka u casumey?

**B.**

Dhirta magacyadoodu hoos ku qoran yihiin, waa kuwa laga dhacarto, marka hawdka lagu biyo waayo: adiga oo dadka yaqaan la kaashanaya, doon kuwa kale, isla markaasna kala sheeg kuwa xooluhu cunaan iyo kuwa dadku cuno ama calaashado.

Dadka : yooco, iyo doombir
Xoolaha: faradheere

**T**

Sidii Warfaa qofka habeenka «Koxdin Awr» dhashaa waxay Soomaalidu tidhhahdaa geelu uma bato. «Haddaba adiga oo dadka yaqaan (siiba reer miyiga) la kaashanaya. sheeg waxyaalaha habeennada soo socda loo nisbeeyo ma lagu tilmaamo:
Bayaxow - Xoorey - Naafcadde

*Curis :*

Si kooban uga sheekee sidii uu Warfaa geela u dhaqaalayn jirey?

MINISTRY OF EDUCATION, TEXTBOOKPRESS MOGADISHU, 4/84 - 50.000